CASHARO NOLOLEED

Xasuusihii sheekh Cali Al-dandaawi

Turjumaddii Muxammed Cumar (Ashraf)

Hordhac

Buuggan waxa ku xusan nolol soo taxnadyd muddo ku dhaw, afartan sano. Taas oo meelo kala duwan ku saabsan. Buuggan waxa lagu soo ururiyay maqaallo aad u badan oo ka hadla mawaadiic kala duwan. Sida jacayl, Taariikh, talooyin, waayo-aragnimo, qadiyado ay leeyihiin ummada muslimiinta ah. Waxa qalinka u qaatay Cabdu Jabbaar Dawla.

Hibayn

Waxa aan u hibeeyay Buuggan qof kasta oo dhallinyar ah, kaas oo doonaya in uu agaalkiisa maal-gashada oo uu kobciyo garaadkiisa **"inta maanku gaajaysan yahay Guuli waa wali."**

Hadraawi.

Sooyaalka sheekh Cali Al-dandaawi.

Laab ka mida layaabka wakhtiga, aqoon iyo xikmad, garaad iyo fahmo, cod-karnimo iyo aftahamo, shactiroolonimo gooniya, aqoon-dheeri ah oo dheeli tiran, xusuus xoog badan, awood ku dhisan gaadhsiinta farriimaha dadka kale, hab-tabin Gaara. Waa Akhristihii awoodda badnaa dhawrsoonihii dhabta ahaa, dhawrsoonidiisu waxay ay ka dhigtay ruux Gaar ah, waa dhawrsoone aan dheef raadis ahayn. Waa xeel-dheer ururinta aqoonta waa xeel-dheer aan lagaga Daba dhufan hadalka iyo gudbintiisa. Waa mid ka mida culimada, iyo baaqayaasha dhinaca ilaahay waana af maal Gaar ah.

Waa Cali binu Mustafaa Al-dandaawi waxa uu ku dhashay Magaalada Dimishiq 12 June 1909. Waxa uu ka dhashay Qoys diineed ku suntan aqoonta Diinta. Asal ahaan waxa uu ka soo jeedaa Magaalada Dandaa ee dalka Masar. Waxana u hayaamay Awoowgii Muxammed binu Mustafaa bilowgii qarnigii sagaal iyo tobnaad Magaalada Midishiq. Waxa uu ahaa awowgii Buuni (caalim) as-hari ah. Waxa loo qaaday dhulka Shaam, halkaas oo uu ku weeleeyay aqoonta caqliyaad (المنطق) gaar ahaan xidigiska iyo xisaabaadka. Aabihiina waxa uu ahaa

sheekh ka tirsan culimada Shaam. Waxa uu ka mid ahaa culimada dadka u meerisa fataawada iyo su’aalaha dhinaca Diinta. Waxa uu noqday Cali Al-dandaawi aabihii maamulihii Madarisaddii Tajaariya ee Magaalada Dimishiq, haddana waxa uu noqday diwaan hayaha Maxakamadda gar-soorka sannadii 1919. Ilaa uu geeriyooday 1925.

Qoyska Hooyadiina waxa ay ahaayeen qoys kaga suntan aqoonta Diinta baladka Shaam. Waxa uu ka mid ahaa Cali abtigii culimadii doorka ah ee ku xusan, kutubta taraajumta (تراجم) waxa la odhan jiray magaca abtigii Muxiya-diin. Waxa uu ahaa nin khudbad yahan ah iyo qoraa islaami ah. Waxa uu daganaa Masar halkaas oo uu ku barbaaray waxa uu ku lahaa maqaal la odhan jiray (الفتح) waxa uu ku lahaa raad wayn ducwadda islaamka qarnigii labaatanaad dhexdiisa.

Waxa uu ka galay geedigiisii waxbarasho Cali Al-dandaawi bilowgii Machad la yidhaa Cusmaani (العثماني) haddan waxa uu arday ka noqday Madarisad la odhan jiray Tajaariya (التجارية) haddana waxa uu ku biiray gudsigiisii sare madarisad la yidhaa Suldaaniya (السلطانية) intaas ka dibna waxa uu galay haddana mar labaad madarisad la yidhaa Jaqmaqiyah (الجقمقية) haddana waxa uu ku biiray Madarisad ay Dawladu leedahay sanadkii 1923 halkaas oo uu galay xafiiska waxbarashada ee qadiimka ahaa ee la odhan jiray Canbar ee ku yaalay Dimishiq waxa uu ka qaatay shahaadada Dugsiga sare sanadkii 1928.

Intaas ka dib waxa uu dib ugu hayaamay Masar, halkaas oo ka galay heerka waxbarashada ee sare koob magaceeda la odhan

jiray Daaru-culuum. Laakiin muu dhamaysan waxa uu halkaas ku sugnaa sanad qudha. Haddana waxa uu dib ugu laabtay Dimishiq sannadii xigtay ee safarkiisa. Halkaas oo uu ka galay Jaamacad waxa uu bartay xuquuqda waxa uu qaatay shahaadada (Bechelor degree) 1933. Waxa uu ka mid ahaa Cali Al-dandaawi dadka isku darsaday laba waxbarasho midda Akdamiga ah iyo midda xerownimda ee Masaajidda culimada lagu la kulmo. Waxa uu culimada ka akhristay culuumta carabiyada iyo dhamaan funuunta Diinta isiga oo u baranayay qaabkii hore ee qadaamiga ahaa.

Markii uu ku noqday Cali Al-dandaawi Shaam, waxa uu ka mid noqday golaha ardayda suuriyaanka ah. Waxa ay wax ka qori jireen hadba arrimaha ka soo kordha xaalada deegaanka. Waxa lagu magacaabi jiray (kolaha saree e ardayda suuriyaanka) (اللجنة العليا لطلاب سورية) waxa loo doortay Guddoomiyaha iyo Hoggaamiya ardayda waxa uu jagadaas Guddoomiyenimo hayay saddex sano. Waxa ay ahaayeen ururkaasi kuwo u taagaan dhaq-dhaqaaq waddanimo oo ay kaga soo horjeedeen nidaamkii gumaystaha ee Faransiiska ee gumaystay Suuriya.

Intaas ka dib waxa uu ka bilaabay Cali Al-dandaawi in uu wax ka dhigo madarisadaha Ahliga ah ee ku yaal Dimishiq isiga oo ah 18-sano jir. Waxa lagu daabacay oo lagu faafiyay hadal-jeedintiisii iyo maxaadirooyinkii uu kaga soo horjeeday Gumaystaha ee uu u jeedin jiray Ardayda, duruusta iyo edabka carabiga ee la yidhaa (Bashaar binu Bardi) (بشار بن برد) Buuggaas

oo soo baxay 1930. Intaas ka dib waxa loo magacaabay in uu Macallin ka noqdo Madaarasidaha Dawliga ah sannadii 1931. Wakhtigaas oo la xidhay wargayskii uu tafatiraha ka ahaa ee la odhan jiray Ayaam (الأيام) waxa uu ku sii nagaa shaqadiisii Macallinnimo ilaa sanadkii 1935.

Noloshiisu waxa ay ahayd wakhtigaas sisilad dhibaatooyin ah, oo ay sabab u ahayd go'aamadiisii waddaninimo ee uu kaga soo horjeeday gumaystaha Faransiiska oo uu ahaa shakhsi aad ugu dhhiran.

Sannadii 1936. Waxa uu ugu hayaamay waxbarasho Ciraaq waxana uu maamule ka noqday gudsi sare oo ku yaal Baqdaad haddana waxa uu ka noqday Maamule madarisad la odhan jiray (دار العلوم الشرعية) waxa ay ahayd Ruuxda Cali Al-dandaawi mid ku dhiiran sheegista xaqa oo aan runta ka gaban. Waxa uu ka sameeyay Ciraaq wixii uu ka sameeyay shaam gaar ahaan Suuriya. Waxa uu ka tagay Baqdaad waxa uu u wareegay Magaalada Karkuuk oo ku taal bariga fog ee Ciraaq. Haddana waxa uu u wareegay Magaalada Basra ee ku taal koonfurta Ciraaq. Halkaas oo uu macallin ka ahaa ilaa sannadii 1939. Halkaas oo ayna kala gu'in wax dhigistiisu hal sano mooyaane oo uu tagay Magaalada Bayruud ee dalka Lubnaan, halkaas oo macallin ka noqday Kuliyada sheerecada sannadii 1937.

Intaas ka dibna waxa uu dib ugu laabtay Dimishiq halkaas oo loo magacaabay in uu Macallin ka niqdo Xafiiska Canbar. Laakiin kumuu joogsan in uu si adag uga soo horjeedo guumaysiga. Arrintaas oo sabab ugu noqtay in aad aad loo soo

dhawayn afkaarihiisa awgeed. Intaas ka dib waxa uu ka hawl galay Madarisad la yidhaa Daaru-suur. Sanadkii 1940. Halkaas oo uu ku nagaa muddo. Intaas ka dib waxa lagaga eryay si Qasab ah, sababtuna waxa ay ahayd khudbad-jimce oo uu si adag ugaga soo horjeestay Guumaysiga Faransiiska.

Sanadkii 1940, waxa uu galay Cali Al-dandaawi xurumaha gar-soorka waxa loo magacaabay in uu Gar-soore ka noqdo Magaalada Nibka. Halkaas oo uu Gar-soore ka aha muddo dhan 11-Bilood. Haddana waxa uu u wareegay tuulada Dumaa oo ka mida toolooyinka Magaalada Dimishiq. Haddana waxa uu Gar-soore caan ah ka noqda Magaalada Dimishiq. Muddo dhan 10-sano. Mar kale waxa uu la taliye ka noqday maxakabadda Shaam. Sidoo kale waxa uu la taliye ka noqday Maxakabadda Qaahira. Waxa uu dajiyay Dandaawi wakhtigii uu qaadiga ka ahaa Magaalada Duumaa Qaanuunka Shakhsiga ah. Waxa loo wakiishay in uu hawshan sanad guduhii waxana Masar loo diray xubin ka tirsan. Maxkabadda Racfaanka. Waxa uu ahaa ustaad Nihaad Qaasim. Kaas oo ahaa wasiirka cadaaladda maalmihii midawga.

Halkaas ayuu ka shaqaynayay sanadkaas oo dhan. Haddana waxa loo xil-saaray in uu ka shaqeeyo oo uu dhigo Qanuunka cusub ee dhaxalka iyo dardaarannada. Waxana uu diyaariyay mashruuc dhan oo ku saabsan xaaladaha shakhsiga ah dhamaantii. Waxa uu noqday Mashruucani seeska uu ku taagan yahay Qaanuunka hadda ee Suuriya. Waxa uu ahaa Qanuunkaasi midka u ogolaaday in uu Gar-soore sharci ah ka

noqdo Dimishiq, Suuriya. Golaha Awqaafta iyo gun-dhiga Dugsiyada saree e sharciga lagu daraasaayo.

Waxa uu noqday Dandaawi Mas’uulka arrintaas muddo dhan 10-sano oo uu ku qaatay Gar-soorka Magaalada Dimishiq. Waxa ay go’aan sadeen ururka imtixaanaadka dugsiyada saree e sharciga ah. Kuwaas oo uu gacan ku lahaa dajinta Qanuunka Awqaafta iyo munaahijta. Sanadkii 1960. Waxa loo soo jeediyay in uu dajiyo Manhajka daruusta dibna kaligii ayaa dajiyay safar uu Masar ku tagay ka dibna waxa uu mideeyay Manhajka As-har iyo midkii suuriya ka jiray.

Waxa uu u wareegay Dandaawi intaas ka dib sanadkii 1963, ka dib markii xaalad dagdag ah lagaga dhawaaqay Suuriya, waxa uu tagay Boqortooyada Sucuudiga. Si uu uga hawl-galo oo uu Macallin ka noqdo Kuliyadda Shareecada iyo midda Luuqadda Carabiga. Ee Magaalada Riyaad. Intaas ka dibna waxa uu tagay oo uu wax ka dhigi jiray Magaalada Maka halkaas oo uu macallin ka ahaa 35-sano.

Waxa uu bilaabay Dandaawi safarkiisan cusub in wax ka dhigo kuuliyadda waxbrashada ee Maka (Collage of education)

(كلية التربية)imtaas ka dibna waxa laga codsaday in uu ka shaqeeyo Barnaamij Dacwadeed. dibna waxa uu ka tagay Kuliyaddi waxa uu ku wareegi jiray Jaamacaha iyo Macaahidda iyo Madarisadaha ee ka jira gayiga Sucuudiga isiga oo ka fulin jiray Daruus iyo Maxaadiraad.

Intaas ka dibna waxa uu u ban-baxay in uu dadka siiyo oo u meeriyo Fatwada diiniga ah oo uu ka jawaabo su’aalaha Diiniga ah. Waxa uu dadka ku siin jiray fatwada goob uu ku lahaa Xaramka. Ama Gurigiisasaacado ka mida wakhtigiisa. Intaas ka dibna waxa uu bilaabay Barnaamij la yidhaa (مسائل ومشكلات) oo laga soo dayn jiray Idaacada. Iyo Barnaamij la yidhaa (نور وهداية) laga soo dayn jiray TV-ga kuwaas oo noqday Barnaamijyada ugu wakhtiga dheer ee ka baxay Idaacadda iyo TV-yada Sucuudiga.

Waxa lagu tiriyaa Dandaawi mid ka mida Ragga Maxaadirooyinkooda laga dhagaysto Idaacadaha iyo TV-yada wadamada Carabta ee ugu horeeyay, halkaas oo ka bilaabay Idaacadda Sharqul-adnaa (إذاعة الشرق الأدنى) ee ka soo hadasha Magaalada Yaafiyaa ee hadda ku taal Falasiin Bilowgii sodonaadkii.

Idaacadda Baqdaad sanadkii 1937. Iyo idaacadda Dimishiq sanadkii 1942. Waxa ay ahaayeen labada Idaacadood ee uu ku bilaabay. Ka dibna waxa uu u wareegay Idaacadda iyo TV-yada Sucuudiga. Halkaas oo uu ka waday wax ku dhow kala Qarni.

Waxa uu faafiyay Cali Al-dandaawi Maqaalkiisii ugu horreeyay ee lagu soo qoro war-gays sanadkii 1926. Ilaa wakhtigaas ilaa wakhtigan uu sucuudiga joogay marna maa ay kala gu’in maqaaladiisa lagu soo qoro war-gaysyada. Waxa uu tafatire ka ahaa war-gays uu Abtigii lahaa oo la odhan jiray Fadxi (الفتح) waxa kale oo uu ka shaqayn jiray war-gays la odhan jiray (الزهراء) oo Masar ka soo bixi jiray. Waxa kale oo uu wax ku qori jiray

War-gays la yidhaa (فتى العرب) waxa kale oo uu Maamule ka ahaa War-gays la odhan jiray (الأيام) kaas oo ay soo saari jireen Dalad waddani ah sanadkii 1931. Waxa ka mida War-gaysyada uu wax ku qori jiray, Cali Al-dandaawi (الناقد والشعب) iyo qaar kale oo badan.

Sanadkii 1933. Waxa uu curiyay Cali Al-dandaawi War-gaysyada la yidhaa (الرسالة) waxa uu ka midaa dadkii wax ku qori jiray ee joogteeyay muddo gaadhasa 20-sano ilaa uu Geeriyooday sanadkii 1953. Waxa kale oo uu xibin ka ahaa War-gaysyada ka soo baxa Sucuudiga (المسلمون، والنصر، والحج.) Waxa lagu faafiyay xasuusihiisii War-gayska caanka ah ee Bariga dhexe la yidhaa (الشرق الأوسط) muddo dhan shan-sano. Waxa uu lahaa Cali Al-dandaawi Maqaallo aad u tiro badan oo ayaynaan halkan ku soo koobi Karin magacyadooda aynaan wada xusi Karin.

Waxa uu ka qayb galay Cali Al-dandaawi Shirar badan oo ka dhacay wadamada Carabta iyo dalal kalaba waxa ka mid Shirarkaas uu qaybta ka noqday. Shirkii Daraasaadka Bulsheed oo ay soo agaasimeen Jaamacadaha Dawladaha Carabtu oo ka qabsoomay Dimishiq. Wakhtigii Shiishakli. Kale oo uu qayb ka ahaa Cali Al-dandaawi Shirkii Bulshada Carabta ee loogu hiilinayay Jazaa’ir. Waxa kale oo uu qayb ka ahaa Shirarka sanad laha ahaa ee ay soo qabanqaabin jireen ardyada Muslimiinta ee dhulalka Reer Yurub. Shirkii ugu mudnaa ee uu qaybta ka ahaa Cali Al-dandaawi waxa uu ahaa, Shirkii ay Bulshooyinka Muslimiintu ku garab is taagayeen Qudus.

Sanadkii 1953, waana shirkii uu ku soo xidhay safarkiisii dheeraa ee uu Halganka ugu jiray Falastiin. Waxa kale oo uu ka soo shaqeeyay Cali Al-dandaawi Bagistaan iyo Indunuusiya.

Markii uu dhaafay 80-sano cumrigiisu ee ay u bilaaban tay daalkii da'du, waxa uu iskaga tagay Idaacaddii iyo TV-gii uu Marnaamijyada ku lahaa. Dadkana waa uu iskaga dheerdaay in yar oo dadka u dhaw ka mida mooyaane. Waxa ay dadku ugu tagi jireen Gurigiisa iyaga oo soo bookhanaya waxana uu noqday fadhigaasi meel ay dadka kaga faa'iidaystaan Aqoontiisa xeesha-dheer, dhinaca Edabka, iyo Masaa'ilka Fiqiga ah, Luuqadda iyo Taariikhda.

18-Bishii June 1999. Waxa uu ku Geeriyooday Cali Al-dandaawi Magaalada Jidda ee dalka Sucuudiga. Naraxariista Eebe dushiisa ha ahaato. AAMIN. Waxa lagu aasay (duugay) maalintii xigtay Magaalada Maka. Waxana lagaga tukaday Xaramka Sharafta leh.

Waxa lagu tiraa Sheekh Cali Al-dandaawi mid ka mida in yahay Gun-dhig ka mida Gun-dhyada Dacwada islaamka ee Caalamka Carabta. Waxa ay ahayd shakhsiyadiisu mid aad loo jecel yahay waxa uu hantay Quluubta Bulshada Carabta iyo dhamaan islaamka. Waxana uu ku diwaan gashan yahay Diwaanka Maamuuska ee dadka u adeegay islaamka.

Cali Al-dandaawi waxa uu dhalay shan Gabdhood mid ka midi waxa ay ku dhimatay wareer Argagixisonimo oo ka dhacay Magaalada Aachen ee Caasimada dalka Jarmalka (Charmany) dhacdadaas oo Shekha Naftiisa Raad wayn ku reebtay. Laakiin

uu ilaahay ajar kaga xisaabsaday uuna Samirka ku dhagay Qaddarka ilaahay u hogaansamay.

Ugu danbayn.

Sheekh Cali Al-dandaawi waxa uu ahaa Dhawr nin oo nin qudha isku ah. Waxa uu ahaa Ustaad, Khadiib, Fiqiyahan, rabeeye, xeer yaqaan, Qoraa, Suugaan-yahan, Gar-soore, Masraxi, Saxafi, Falanqeeye, Daaci. Waa mid ka mida dadka dhifta (mar la arag) ah ee koobay garaad badnaanta iyo wacyiga. Waxa uu u soo joogay intaas oo is badal oo ku dhacay Dawladii Cusmaaniyiinta ilaa uu ka god galay.

Sheekhu muu ahayn Ganacsade, munuu ahayn nin dhuuni raadis ah. Ee waxa uu ahaa Dhakhtar ummadii u sida Daawadii uu kaga dabiibi lahaa cudurka dilaaga ah ee Aqoon la'aanta. Ilaahay Gurigiisa Janno haka dhigo.

Jacaylka:

Ayaa ka hadalka u diiday jacaylka?

Ilaahay waa midkii ku ladhay Ubaxa Ubax kale si uu u soo saaro Midho, waa midkii ku xidhay Xamaamka Xamaam kale si ay u dhalaan Beed (Ukun). Waa midkii u dhaweeyay Buurta Buurta

kale si uu dhoxdooda uga dillaaco waadi (Tog). Waa midkii dhulka Qorraxda u soo saaray si uu Habeen uga danbeeyo. Ilaahay waa midka ku xidha Qalbi Qalbi kale si uu ilmo uga dhasho dhexdooda. Haddii aanu jacayl jiri lahayd Laantu Laanta kale kuma ay maroorsanteen Kaymaha Fog dhexdooda. Haddii aanu jacayl jirin Deeradu Deerada kale kama ay ag dhawaateen. Haddii aanu jacayl jirin Awrku kumuu guuxeen Hasha. Haddii aanu jacayl jirin Daruuruhu kumay reemeen Dhulka ingagan. Haddii aanu jacayl jirin Ubaxu kamuu dhoolo caddeeyeen dhulka dushiisa wakhtiga Gu'ga. Noloshuba waxba maa ay ahaateen haddii aanu jacayl jiiri. Laakiin waallidu waddo kuma laha jacaylku. Jacaylka waalida ah waa mid qof hilmaan siiya Diintiisa. Ama dayaca dhaqankiisa wanaagsan. Ama Bur-buriya Ninka Nin-nimadiisa. Ama uu ku iibsada eegmo qudha oo addunka ah cadaabka Jannama oo kunsano oo ka mid ah.

Alla miyay Dhallinyaradu u noqdaan jacaylka oo uu yaraado dhib kani oo uu fududaado fasaadkani. Laakiin siduu noqoyaa jacaylku marka laga reebo baahiyaha Jinsiga ah. (Galmada)

Haddii ayna dhuxushu ku dhalaalin dhulka wakhtiga uun maa uu dhaleen Dahab. Haddii aan doonista lagu xabaalin Qalbiga dhexdiisa ma noqoto jacayl.

Jacaylka iyo Quruxda.

Maxay ka yidhaahdeen Abwaanadu jacaylka? Maxay ka qoreen Qorooyadu jacaylka? Miyay koobeen macnaha jacaylka? Miyay sheegeen siraha Quruxda? Kalmada jacaylku waxa ay ka kooban tahay laba qaybood oo kale ah qayb danayn iyo Naxariis ah, iyo qayb kale oo daganaan iyo xasilloni ah. Kalmada marka aad Bishimahaaga kaga dhawaaqaso waxa aabad moodaa in uu Qalbigaaga ku dhamaanayo ereygaasi.

Kalmada jacayl miyay koobtay dhamaan muuqaalada qaybaha jacaylka?

Hooyadu waxa ay jeceshay ilmaheeda, mid kale waxa uu jecel yahay dhulka Maka, mid kale waxa uu jecel yahay fardo-fuulnimada, qofna waxa uu jecel yahay Digirta lagu badhxay Saliidda, Qaysna waxa uu jeclaa Layla. Midkaasi jacayl qudha miyaa? Jacaylka ilaahay waa Jawharka iimaanka miyaad garanasaa mid mid kale u eeg jacayladaas aynu soo sheegnay? Quruxdu waa quruxda dabiiciga ah waa midda aad ka aragayso Gabadha quruxda badan waa midda ka muuqata Sheekha dhawrsoon. Quruxdu miyay isku mid tahay? Maya isku mid maaha mid kastaba waxa ay leedahay dhadhan gooniya iyo midab gaara.

Mucaashiqiintu maxay doonayaan?

Waydiiya gabayaaga, ha idiinku dhaartaane in ayna doonayn ilaa eegmo qudha oo ay eegaan cidda ay jecel yihiin ee agtooda ku wayn. Iyo dhoollo caddayn u iftiimisa Jawigooda oo uu doono in uu isku duubo iyo uu galo Laabta cidda uu jecel yahay.

Waxa uu ku dhamaanayaa wakhtigiisu in uu si khiyaala qalbigiisu uu iyad u jecel yahay ka suuraysto isiga oo aan garanahayn ma jirtaa haddii ay jirtana halkay joogtaa! Markaas ayuu arkayaa mar qudha markaas ayuu eegayaa eegis, uu u malaynayo in uu ka ogooday sidii wax waligiiba jiray. Markaas ayuu doonayaa in aanu mar qudha agteeda ka fogaan. Waxa uu ku dhaaranayaa in aan cid kale loo abuurin iyada mooyaane, aan isiga loo abuurin iyada mooyaane. Dhagtiisu waxa ay jeceshay maqalka hadalkeeda ishiisuna waxay jeceshay in ay iyada dhawrta mar kasta. Colaashiisu waa ay baahan tahay haddii ay wax cunto iyadu isna waa uu dhargaa. Haddii ay wax cabto isna waa uu cokonaadaa. Haddii ay faraxdo isna waa qoslaa, haddii ay dhibtooto isna waa ilmeeyaa, haddii ay wareertu isna madaxa ayaa wareera.

Waxa uu daneeyaa wax kasta oo farxadeeda ah. Waxa uu nafta u horaa sidii uu ugu raali galin lahaa jiritaankiisa. Habeenkii oo dhan waa uu dhafraa isaga oo dul-saaran sariirtiisa hilow uu qabo darteed. Waxa uu u diyaar sadaa hadal dheer si uu Dhagaheeda u maqashiiyo dhambaalo qurux badan oo ka soo

baxaya qalbi la dhacsan abuurtan dheelliga tiran. Laakiin marka uu arko abuurtaas waa uu hilmaamaa wax kasta oo uu soo diyaarsaday! Haddii uu hadal damco kumo hadlo wax iyada ka baxsan. Haddii uu aamuso waxa uu ka fikiraa iyada waa maqane jooga iyo jooge maqan. Waddo kasta aqoon la'aan ayaa uu kaga sugan yahay ilaa jidka loo maro mooyaane. Waxa uu ku raali noqdaa wax kasta oo yar oo dhinaceeda ka yimaada. Haddii ay u dhoollo caddayso waxa aad moodaa in uu wakhtigu u dhoollo caddeeyay. Haddii ay ku tidhaa ereya waxa aad moodaa in uu wakhtigu qalbigiisa ku waraabiyay Ruux. U Naxariiso wakhtigow Qalbiyada kuwa wax jecel.

Jacaylka iyo Guurka

Waxa ay i waydiisay maalin jacaylka iyo Guurka waxa aan ugu jawaabay "ilaahay waxa uu ku abuuray Basharka laba baahiyood. Midda koobaad waa in uu doono in ay waarto qofnimadiisu middaasi waxa ay ku sababtay in uu wakhtiga uu gaajoodo uu doono in uu wax quuto si ay u noolaato Naftiisu. Midda Labaadna waa in ay ku abuuran tahay baahida doonista oo ah in ay waarto noociyadiisu. Middaasina waxa ay ka dhigtay in uu u baahdo in uu ka ag-dhawaado Jinsigiida haddii uu Lab yahay waxa uu u baahan yahay in uu ka ag-dhawaado

Dhadig. Haddii uu Dhadig yahayna waxa uu u baahan yahay in uu ka ag-dhawaado Lab.

Si kasta oo ay u qurxiyaan Abwaanadi iyo suugan-yahanku jacaylka, jacaylku waa kaliya xidhiidhka dhex maraya laba Jinsi (Lab iyo Dhadig). Waddo kale jacayl laguma helo. Jacaylka Bikrada ah waa sheeko-khuraafaad ku dhex faafta dadka waalan iyo Dhallinyarada oo qudha. Jacaylku waa gaajo-nafeed, ee ma awoodaan laba gaajaysan in ay sheetaan dhadhanka cuntada ay u baahan yihiin?

kuma hagaago Guurka in jacayl qudha lagu dhiso waxa uu ku hagaagayaa in lagu dhiso sees adag oo ah, is-waafaq fikir iyo dhaqan togan iyo qaab-nololeed. Bulshaysan. Waxaas oo dhan waxa ay ka yimaadaan dareenka iyo caadifada qofka waa uu eegayaa Iyana waa ay eegasaa labadaa qalbi ilaahay dhexdooda waxa uu dhigaa isku dareen noqosho iyo is danayn midba mid kale uu u leexanayo. Gal-gacalkaas ayaa waxa uu dhalaa jacayl dhidibo adag ku taagan oo kuu Guur ku danbeeya.

Jacaylka fiqi-yahannada.

Waxa uu igu yidh sheekh ka mida sheekhyada kaas oo ay gaadheen dhawr ka mida maqaalada aan ka qoray Jacaylka. “Maxaa idin kala galay adiga iyo jacaylka adigu waxa aad tahay Sheekh iyi qaadi (gar-soore) umana habboona sheekhayada iyo gar-soorayaasha in ay ka hadlaan jacaylka.” Waa aan ku qoslay waxa aan ku idhi “marna miyaanad kicin wakhtiga hiraabta (suxuurta) oo aanad dareemin Neecawda hebeenka debecda-san. Iyo xasilloonimada hadlaysa iyo quruxda goonida ah, oo aanad dareemin dareen aan dabcigaaga ahayn oo aanad tilmaan kaga bogan Karin?” marna miyaanad dareemin habeenka badhaxa tiran dhixdiisa cod macaan oo ka soo baxaya fannaan cod macaan oo ilaahay ku galladay hibo faneed? Miyaanu qalbigaagu gil-gilan oo aan qalbigaaga taaban dareen layaab leh? Miyaanad mar Naftaada la gooni noqon oo aanad ka fikirin wakhtigii tagay farxadiisii iyo murugadiisii oo aanad dareemin in aanu dib u soo laabanayn? Marna miyaanad akhriyin Qiso jacayl ama war ka mida wararka Geesinimada oo aanad dareemin Naar dhex soconasa xubnahaaga ama garab shinbireed oo garaacaya Laabtaada? Miyaanad Nolasha ku arag muuqaalada quusta? Miyaanad eegin quruxda Kawnkan oo aanu saamaynta ku yeelanaya dareemayaashaada? Waxaas oo dhami waa dareemo ka imanaya Jidhka iyo Garaadka.

Farxadda

Waxa aynu xisaabinaa hodantinimada xoolaha oo qudha, ee hodantimadaasi waa mid kali ah. Miyaydaan garanahayn Qisadii Ninkii Boqorka ahaa ee xanuunsaday, ee loo keenay cuntada ugu dhadhanka macaan ee aan haddana awooi waayay in uu wax ka cuno cuntadaas? Markaas ayuu fiirayay daaqaddii ku beegnayd Bustaankiisii isaga oo cunaya Raadhi (Rooti) qalalan. Maxaynu mudnaan u siin waynay Lacagta caafimaadka, caafimaadku ma lacaga ayuu leeyahay? Bal xasuuso sheekada Ninkii ku lumay Saxaraha. Ee aadka u harraaday ka dibna arkay Biyo ku jira weel ee aad ugu farxay ka dibna cabbay Biyihii, ka dibna haddana arkay Kiish ka samaysan Harag markii uu furay Kiishkii waxa uu dhex helay Timir iyo Roodhi qalalan. Markaas ayuu quustay isaga oo la yaaban Roodhin qalalan ka dibna daal ayuu kula dhacay halkii. Isaga oo u malanayay in Kiishka ku jiro Dahab! Maxaynu Dahab u raadinaa innaga oo Dahab badan haysanna? Araggu miyaanu Dahab ahayn? Caafimaadku miyaa Dahab ahayn? Wakhtigu miyaanu Dahab ahayn? Maxaynu u garan la’nahay mudnaanta Nolosha? Caafimaadka, wakhtiga, iyo Garaadkuba, waa Maal. Waxaas oo dhami waa sababaha farxadda ciddii doonta in ay ku faraxdo.

Faraxadaas oo dhan waxa Madax u ah oo ugu sarreeya Iimaanka. Iimaanku waxa uu dhargiyaa midka baahan. Iimaaku waxa uu hodmiyaa midka saboolka ah. Iimaanku waxa uu magan galiyaa midka murugaysan. Waxa uu xoojiyaa midka

tabarta daran. Waxa uu deeqi ka dhigaa midka dhibcaalka ah. Waxa uu ka dhigaa qofka iimaanka leh iimaanku mid weheshada iimaankiisa. Midka wareeray waxa uu ku dhigaa mid go'aan leh. Waxa uu kabaa midka Niyadda jaban tahay.

Waxa aad tihiin kuwo faraxsan, laakiin ma garanasaan. Waad farxi lahaydeen haddii aad garanasaan inta ay leeg tahay galladaha aad ku raxaysanasaan. Waad farxi lahayd haddii aad garan lahaydeen mudnaanta ay leedahay Nafihiinnu. Ka raadiya farxadda Nafihiinna ee ka haka raadinana hareerihiinna. Farxad ayaad heli lahaydeen haddii aad wakhti kastaba aad ilaahay dhiniciisa ahayn lahaydeen. Oo aad uga mahad celin lahaydeen galladihiisa faraha badan. Oo aad u samri lahaydeen dhib kasta o idinku dhaca. Labada goorma waa aad faa'iidaysaan haddii aad ilaahay u mahad celisaan waad Liibaanaysaan. Haddii aad ku dhabar adaygtaan dhibaatooyinkana waa aad Liibaanaysaan.

.

Anigu maanta ayaan Hooyaday qoroyaa, laakiin mid kasta oo adinka, idinka midi ha akhriyo hadalkan.

Qofka u fadhiista akhrinta ereyadan ee ay Nooshahay Hooyadii ha haleelo Hooyadii inta noloshiisa u dhiman Hooyadii si aanu u noqon mid ka maqan Hooyadii wakhti qudha. Haddii ay tahay Hooyadaa qof wayn ama mid

xanuunsan ama mid garaadkeedi is dhimay oo doonisteedu badan tahay. Xasuuso haddii ay maanta kuu baahan tahay adna shalay ayaad u baahnayd. Haddii ay maanta kaa doonto xoolo-adduun hore ayay iyadu Nafteedii iyo Jidhkeedii kuu siisay. Waxa ay kugu qaaday Caloosheeda oo waxa aad ahayd xubin ka mida xubnaha jidhkeeda oo waxa aad quudanasay dheegeeda. Waxa ay kugu dhashay haddana daal iyo dhibaato wayn oo ay kaa soo martay. Waxa aad ka soo go'day jidhkeeda go'itaan dhibaato badan. Miyaanad xasuusnayn maalintii ay caloosha kugu siday adiga oo maraya Bishii sagaalaad, oo soo gaadhay caloosheeda qayntii hoose ka diban ay socon kari wayday culayskii aad ku haysay awgii, oo ay awoodi wayday in ay hurdo ka bogoto?

Miyaanad indhahaaga ku arag Gabadh ilmo ummulaysa (dhalaysa) miyaanad maqal qaylida ka soo baxaysa wakhtigaas? Haddii adiga xanuunka aad Hooyadaa soo marisay ay cid kale ku maran lahayd manaad hilmaanteen ee waa aad ka aar-goosan lahayd. Laakiin adiga Hooyadaa dhibkaas oo dhan waxa ay ku hilmaantay ilbidhiqsi ka dib markii aad Caloosheeda ka soo baxday. Intaas ka dib waxa ay ku galisay Leebteeda waxa ay dareentay in aad tahay Ruuxdeedii oo dabadda uga soo baxday! Waxa ay ku nuujisay Naaskeeda si ay u dareento awood intii ay daciiftay ka dib. Waxa aad ku awoodaysanasaa Canahaas oo aad ku noqonasaa mid ku kora oo ku gaalin gala. Adiga oo daciifinaya Awoodda Hooyadaa. Hooyadaa waxa ay jeceshay in ay iyadu daciifto oo aad adigu awood yeelatid! Haddii ay cidhiidhi noqoto

Nolosheedu waxaas oo dhan waa ay yaraysanaysay kol haddii aad adigu agteeda joogtay. Waxa ay ahayd mid kaa dhex aragta Nolosheeda oo dhan. Haddii aad u dhoollo-caddaysa waxa ay dareemaysay in Nolosha oo dhami u dhaallo-caddaysay waxa ay kaa dhex arkaysay rajadeeda oo dhan. Haddii aad oydo waxa ooyay Qalbigeeda waxa ay madaw noqonayay maalinteeda! Haddii aad xanuunsato waxa ay ka tagaysay hurdadeeda oo dhan waxa ay hilmaamaysay in ay wax cunto waxa uu waagu u baryayay iyada oo aan hurdo ka bogan. Haddii aad ahayd mid soconaya waxa ay ahayd Hooyadaa mid ku ilaalisa oo aan cidna kugu dooran. Haddii aad si dhaba qalbigaaga uga jeclaato, boqolkiiba hal maad dhamaystirin jecaylkeeda!

Haddii aad leedahay AABO oo da'noqday oo kuu baahan, xasuuso in uu isagu doortay in uu daalo si aad adigu u raaxaysato. Waxa uu shaqeeyay oo uu hanti u ururiyay waa adiga. Waxa uu mustaqbalkiisii u dayacay si uu adiga kaagu u hagaago. Waxa uu ahaa mid ka soo laabta shaqada isaga oo daalan oo burbur iyo caato ah, si uu qalkiisa ugu nasto. Markaas ayaad ku odhan jirtay "AABO" oo aad gacantaad yar dhinaciisa u soo fidin jirtay si aad u gacan qaado. Markaas ayuu hilmaami jiray daalkii iyo tabcaankii oo dhan. Waxa aad u ahayd meesha uu ku hilmaamo dhamaan culaysyadii uu Nolosha kala soo kulmay.

Ogow mar kasta oo uu kordho cimrigaagu, iyaga (AABO IYO HOOYO) cimrigoodu hoos ayuu u dhacayay. Mar kasta oo aad

gaadho wakhtiga dhallinyaranimada iyaga waxa tagayay wakhtigoodii dhallinyaranimo. Mar kasta oo aad noqoto mid xoogan, iyaga waxa ay noqonayeen kuwo dabar-daran. Waxa aad ka helaysaa dadka dhexdooda mid kuu muujiya in uu ku jecel yahay, jacayl ka badan mid ay kuu muujiyaan labadaada waalid. Balse ogow qofkaasi waxa uu jecel yahay waa xoolahaaga, ama quruxdaada, ama mansabkaaga, ama xaaladaada oo wanaagsan. Laakiin haddii ay Noloshaadu xumaato oo ay dhamaadaan xoolahaagii, waa uu kaa tagayaa dibna kuu xasuusan maayo waxa uu noqonayaa sidii qof aan waligiiba ku arag. Laakiim cidda ku jecel si kasta oo aad tahay iyo xaalad kasta oo aad ku jirto jacayl aan is doorin waa Hooyadaa iyo Aabahaa. Qof ay Nooshahay Hooyadii ama Aabihii, ama labadoodiiba, waxa u furan qofkaas Albaabkii uu Jannada ka gali lahaa. Waa kuma qof soo maraya Albaabka Jannada oo furan ee aan haddana aan ka galayn?

Xaaskaygii

Waxa ay jeceshay cidda aan jecelahay. Waxa ay neceb tahay cidda aan necebahay. Haddii ay ku dadaalaan Dumarku in ay dadka raali galiyaan iyadu waxa ay ku dadaashaa in ay aniga I raali galiso. Waxa aanu wadaagnaa wax kasta oo dhexdayada yaal. Xumaan iyo wagaan. Waxa aanu hodan ku nahay

gurigayaga oo aanu kaga maarannay Guryaha Kirada ah. Waxa ay jeceshay ehelkayga waxa ay ii sheegtaa wax kasta oo wanaag ah. Haddii aan ka gaabiyo qof kale xaqiisa waa ay xasuusisaa haddii uu khilaaf nasoo dhex-galo aniga iyo walaashay waxa ay ku dadaashaa in ay na wanaajiso oo ay wanaag dhex dhigto dhexdayada. Waa tusaale nool oo ay ku dayato Gabadha Reer Bariga ah, ee aan adduunka ka aqoon ilaa ninkooda mooyaane.

Kuwaas oo ay saluugeen dhallinyarada badhkood. Qaar ka mida dhallinyaradu waxa ay u socdaalayaan Yurub iyo Ameerika si ay u soo helaan Shahaado warqad ah oo gacanta ku soo qaataan iyo Gabadh ay kilinkilada ku soo qarsadaan. Waxa ay socdaal dheer u galayaan si ay Gabadh u doontaan Gabadh aan qurux iyo sharaf midna lahayn. Iyaga oo Gabdhaha Reer Bari ah u haysta kuwo loogu talagalay in ay noqoto Gabadh guryaha ka adeegta! Laakiin waa fasaad akhlaaqeed iyo Garaad la'aan. Dhaqankaasi in uu yahay ayaad dareemasaa liidasho iyo indho la'aan. Waxa ay caddaynasaa in midka awoodda yar uu daba-socde u yahay midka awoodda badan. Waxa ay filayaan haddii ay Guursadaan Gabadh Reer Maraykan ah ama ka shaqaysa koobaha shaneemooyinka ama xafiisyada Huteeladda in ay hanteen wixii Adduunka ugu mudnaa!

Gabdhaheennu waa Gabdhaha adduunka ugu wanaagsan ee mudan in la guursado ee mudan in ay caruur kuu dhalaan. Ee naf ahaan ugu sharafta badan. Ee nasab ahaanna ugu

wanaagsan. Ee kaa dhagaysan og wax kasta oo wanaagsan ee kaa maqli og wax kasta oo waano iyo wax u sheeg ah.

Wiilkaygii

Maya inankaygii, is daji maaha midka aad ka cabanasaa xanuunkaaga oo qudha, laakiin waa xanuunka dhallinyaranimo. Midka sanamka caabudayaa waxa Rabbi u ah dhagax. Gabadha uu jacaylku ku dhacayna waxa Sanam u ah khiyaalka. Waxaas oo dhami waa wax dabeeci ah waana maan-gal. laakiin midka aan waligii maan-galka noqonayn waa in uu wanaagsanaado qof barbaarka ah inta uu ku jiro da'da 15-jirnimada. Waxa dhib ku ah qaabka waxbarashada waxana uu neceb yahay in uu wax barto ilaa laga gaadho da'da 20-sano ama 25-sano.

Maxay sameeyeen sannadahani? Waa sannadaha ugu daran dhinaca dareenka qof dhallinyarada ah ee uu ku dawakho qofku doonistiisa aan xadka lahayn. Maxay sameeyaan sannadani? Waa dhibaato, waxa ay noqon kartaa in aad raacdo naftaada oo ay hagaan kuu noqoto Naftaadu iyo doonista rabitaankaagu, oo ay kuu bilaabanto in aad ka fikirto sidii aad u cokin (dhargin) lahayd baahidaada, oo aad wakhtigaaga ku bixiso Daawashada filimada foosha xun iyo Sawirada qaabka daran, oo ay xaaladaasi kuugu sabab noqoto Waalli aad gasho iyo in aad Nolosha ka dhacdo oo Naftaadii

gasho cidhiidhi Nololeed. Ama ay kuu horseedu doonista naftaadu in aad gasho Guryaha xumaanta (Guryaha tumashada) oo aad marto wadada hallowga oo aad ku doorsato dhallinyaranimadaada, caafimaadkaaga, mustaqbalkaaga, Diintaada, waxa yar oo macaan ah oo ay ka danbayso murugo maahsan oo aan xad iyo xuduud midna lahayn oo aad ku dhacdo aqoontii iyo Shahaadadii aad dartii u wax u baranaysay oo ay Noloshaadii sidaa ku rajo beesho.

Haddaba haddii cudurkii Dhallinyaranimo kaas yahay waxay Dawadiisii?

Dawadu waa in aynu u noqo Sunnada suubbahana scw, iyo arrimihii Nafta lagu ilaalin jiray. Guurku waa jidka qudha ee wanaagga. Haddii aanu guurku kuu fududaan oo aanad haddana xumaanta ku dhicin, waxa qudha ee aad ku badbaaday waa Cabsida ilaahay, iyo in aad cibaadada dhex dhuunbatay oo aad wakhtigaaga ku bixisay barashada aqoonta. Wakhtigaaga oo aad ku bixiso. middaasi waa Dawada ugu wanaagsan ee aad kaga badbaadi karto dabinka doonista.

Inantaydii

Albaabka wanaaggu waa hortaada inantadiiyeey, furihiisuna gacantaada ayuu ku jiraa, dhawrsoonaantaada ku faan, sidaas u noolow. Ha rumaysan waxa ay Ragga qaar ka midi ku leeyihiin, kaama doonayaan oo ma danaynayaan dhaqankaaga

wanaagsan. Waxa ay hadalka wanaagsan kuugu la hadlayaan ee ay ereyada macaan kuu lee yihiin waa Been Eebe magacii. Haddii aad maqli lahayd waxa ay ku sheekaystaan Dhallinyaradu wakhti ay isla gooni yihiin waxa aad maqli lahayd hadal maankaaga daaliya oo aad ku dawakhdo. Dhoollo caddaynta uu kuu dhoollo caddeyo wiilka dhallinyarada ahi ama hadalka uu ku jelcinayo ama waxa uu ku siinayo waxa uu gogol-dhig u yahay waxa uu kaa doonayo ee aan wanaaga ahayn.

Inantu mar kasta oo ay gaadho hodonnimo ama caannimo. Waxa ugu wayn ee rajaysaa waa in ay rajayso waa in ay guursato oo ay guri yagleesho oo ay noqoto oori wanaagsan iyo Boqorad guri dagan. Laakiin haku dagsamin dumarku caanka ah ee ay ka daawadaan mareegaha Hollowoodka. Guurku waa heerka ugu sarreeya ee Gabadha ididiiladeeda ah.

Uma habboona inantu in ay ku dhex-milinto Ragga een ehelkeeda ka mid ahayn. Uma habboona inanta in ay gurideeda ku qaabisho ninkeeda saaxiibkii. Uma habboona inanta in ay gacan-qaado Ragga aan ehelkeeda ahayn oo ay la socoto waddooyinka oo ay tidhaa “imtixaanka ayaan la diyaarinayaa.” Ha xasuusato in uu ilaahay iayada ka dhigay Dhadiga isigana Lab. Uuna mid kastaa I iilanayo mid kale dhiniciisa. Mana awoodaan iyada iyo isagu iyo dadka dhulka ku nool oo dhan in ay dooriyaan abuurka ilaahay. Mana simi karaan kala dunaanshaha Labka iyo Dhidigga. Ama ay u diidaan Nafahooda iilashadaas. Kuwa ku baaqa is dhex-galka ma

doorin karaan abuurtaas. Laakiin waxa ay doonayaan in ay u raaxeeyaan xubnahaada oo ay raalli galiyaan doonistooda. Waataas taladaydu inantadiiyeey waana midda dhabta ah ee xaqiiqada ku toosan.

Ogow in aad adiga gacantaada leedahay wanaaga oo dhan gacantaada ayuu ku jiraa wanaagaagu. Kuma jiro gacmaha ragga iyo cid kale toona. Haddii aad doonto wanaaji Naftaada si ay ummada oo dhami u wanaagsanaato.

Caruurteennu ha-qaadaan mas'uuliyadooda.

Wakhtigii adkaa ee aynu ku soo barbaarnnay ka dib waxa aynu noqonnay in aynu u cabsanno caruurteenna oo aynu uga baqno hawlaha adag. Xataa waxa aynu uga cabsannaa waxyaabaha dabeeciga ah, sida gaajada iyo salawga, waxa aynu siinaa wax badan oo ana u baahnayn. Waxa aynu iska daynaa iyaga oo caajisnimo la hurda! Uma dhiibno waxba si ay mas'uulid u qaadaan innaga oo u tudhanna iyaga waxana aynu u qabannaa wax kasta oo ay doonayaan maxay tahay Barbaarintaasi?

Miyaynaan ahayn Bashar iyaga oo kale ah oo leh awood xadidan? Waxa aynu caruurteenna ku barbaarinnaa in ay cid kale ku tiirsanaadaan middaasi waa barbarian gurracan. Hooyada dhugta leh waxa ay ku barbaarisaa ilmaheeda yar in

uu qaado mas’uuliyadda Naftiisa. Si uu u noqdo mid wax qabsan kara mustaqbalkiisa.

Dhibirsanaanta xoolaha ka hor.

Ma’aha dhibirsanaantu in aad xoolo badan tahay oo qudha. Xooluhu waxa ay wax u taraan midka saboolka ah oo qudha. Laakiin qalbigiisa kama siibayo dhibirsanaanta dadka hodanka ah waxa ay faa’iidaystaan maalkooda waa in ay dadka qalbigooda u dhibriyaan oo jacaylk u muujiyaan. Qof sidaa samaynaya waxa uu leeyahay damiir dhibirsan. Waxa mudan haddii aad qof hodan ah, tahay in aad dareento qofka saboolka ah in u adiga oo kale yahay. In aad dareensiiso in uu leeyahay Naf sharaf badan. Waxa mudan haddii aad qof baahan wax ku tarayso in aad wax ku tarto adiga oo aan u tusayn in uu kuu baahan yahay, waxa ku tar adiga oo soo dhawaysanaya oo gacan qaadaya. Wax aad siiso adiga oo is waynaynaya sidan ayaa ka wanaagsan.

Qof kasta oo hodan ah waa uu awoodaa in ii wax badan ku taro dadka saboolka ah. Laakiin qofka hodanka ah ee haddana dhibirsan in uu wax taro isaga oo ku badh-xaya bixintiisa kal-gacal iyo dhibirsanaan. Hakaga dhabcaalina (bakhaylina) dadka baahan dadnimadiinna iyo in aad siisaan qalbiyadiinna, dareensiiya in ay yihiin bashar aan cidna u baahnayn.

Dareensiiya in ay yihiin idinka oo kale oo ay dhaleen Aabo iyo Hooyo qudha oo ah AADAM IYO XAAWA. Waxa aad maalin kasta aad la kulmi doontaan dad baahan oo duruufuhu wajaheen. Ilaaliya qalbiyadooda oo dareensiiya daganaan iyo in ay yihiin walaalo aan laga maarmin marnaba. Ha iska sarraysiinnina hoosna u eegina waa dad bashar ah oo maamuusan. Maxaad dareemi lahayd haddii adiga oo baahan ay een Niyad-jab iyo han-jab labadaba. dadku kugu dheeli-dheeli lahaayeen? Sow maddaasi kuguma keenteen.

Iimaanku waa jidka daganaanta

Wakhti ka mida wakhtiyada, ayaa waxa ugu habsaday wal-wal, waxa aan doonay sidii aan uga bixi lahaa wal-walkaas, waxa aan isku dayay dhawr goor. Ilaa shan iyo lix jeer in aan ka baxo. Intaas ka dib ayaan naftayda ku idhi “maxaan uga war la’ahay cidda gacanta ku haysa arrinkayga oo dhan oo aan dhabarka ugu sidaa wal-bahaarkan? Ayay ahayd ciddii arrinkayga maamulaysay wakhtigii aan ahaa ilma yar oo caano nuug ah? Ee aan ahaa mid aan awoodin in uu hadlo oo uu Naftiisa ka dhawro Hangarallaha (dib qallooc) dhulka dul tukubaya? Ayuu ahaa midkii dabka iga weecinayay wakhtigii aanan dhuxusha dabka ah iyo dahabka aanan kala soocayn? Ayay ahayd ciddii i ilaalinasay wakhtigii aan ahaa uur-jiifka? Waxa uu ahaa ilaahay oo arrinkayga oo dhan gacantiisa ay ku jirtay.

Wakhtigii aan si dhaba u gartay in ay arrintaydu ilaahay gacantiisa ku jiro waxa iga dagay wal-walkii dhabarkayga culaysiyay waxa aan noqday mid dagan. Waddada lagu gaadho macaanka iimaanku waa: Ducada. Ilaahay bari markasta ducada qudheeda ayaa ah cibaado. U jeedka ducadu maaha ereyada lagu celcelinayo iyo weedha kooban. U jeedku ducada ay ku duceeyaan wadaadu maalinta jimce iyaga oo doonaya in ay dadka kaga yaabsadaan sida ay u soo qaybeen iyo af-tahannimadooda. Dadaalka ay ku bixinayaan in ay dadka kaga yaabsadaan waxa uu ka badan yahay midka ay ku bixinayaan in uu ilaahay ka aqbalo. Wadaadadaasi waxa ay ka dhigan yihiin sidii qof ku hadlaya Telefoon, (Telephon) laakiin uu go'an yahay telefoonka xadhigii xidhiidhinayay codka hadla iyo lala hadlaha! U jeedka ducada laga leeyahay waa in aad si dhaba ilaahay ugu badhax tirto ilaahay. oo aad qalbigaaga ka saarto wax kasta oo kale. Badanaa! Weedh uu ku duceeyay qof aan aqoon badan lahayn balse ilaahay u badhax tiray oo ducadiisii la aqbalay. Badanaa! Mid aqoon badan oo Ducooyin badan ku duceeyay balse aan ilaahay agtiisa waxba ka goyn. Haddii aad joogtayso la rafiiqa dadka wanaagsan, oo aad ilaahay si dhaba isiga dhawrto, oo aad baryadiisa joogtayso, oo habeen kasta kuu ahaato Laylat-Qadri waxa aad halaysaa daganaan Nafeed iyo rayn-rayn gudeed.

Amaanada

Ma’aha oo qudha Amaanadu in aad guddo oo aad celiso waxa gacanta laguu galiyo oo aad u dhiibto ciddii kugu aamin tay middaasi waa muuqaalk iyo qaab ka mida qababka Amaanada. Gar-sooraha awoodda gacanta ugu jirta ah ee in uu dadka kala saaro waa Amaano. Haddii uu iisho Tin in leeg waa uu khiyaamay Amaanadaas. Shaqaalaha shaqada uu gacanta ku hayaa waa Amaano haddii uu ka gaabo iyo uu halleeyo waa uu khiyaamay Amaanadaas. In ay dadku kaa aaminsan yihiin in aad tahay qof wanaagsan waa Amaano haddii aad aaminaadaas aad uga faa’iidaysato in aad adduun ku ursursato waa aad khiyaantay Amaanadaas. Haddii Gadhkaaga cufan iyo cumaamadaada wayn uga faa’iidaysato in aad dadka adduun kaga hesho waa aad khayaantay Amaanadaas. Waxaas oo dhami waa khiyaamo iyo wax badan oo aynaan xusini. Bal wakhtigaaga iyo cimraagu oo dhami waa amaano saacad qudha haku bixin oo wakhtigaaga ka mid ah meel aanu raali ka ahayn midkii Amaanadaas iska lahaa!

Xagee ayay ka joogaan maanta muslimiintu arrinkaas?

Waxa aad ku arkaysaa farsama yaqaannada, ganacsata, culimada in ay ku yar tahay Amaanadu agtooda. Qofku maanta waxa uu kuu muujisanayaa jacayl uu adiga kuu qabo. Laakiin haddii ay wax idin dhex maraan waxa uu jajabinayaa lafahaaga! Waxa uu kugu cunayaa bilaa Milix! Xagee ayay ka aaday amaanadi dadkaas muslimiinta ah.

Sidee ayay u dhacday in qof muslim ah lagag kalsooni bato mid Faransiis ama Sahayuuni ah? Waa masiibo way oo ku dhacday

dadka muslimiinta ah. Bal u fiirsada waxa ay sameeyaan koobaha waxbarasha iyo barayaasha jooga! Bal u fiirsada waxay sameeyaan Masaajidda iyo wadaadada jooga! Bal u fiirsada waxa ay sameeyaan war-gaysyada iyo Ragga wax ku qora. Haddii aynu ku dayanno Reer Yurub, maxaynnu dhinaca xumaha oo qudha ugaga dayannaa! Maxaynnu ugaga dayan waynay dhinaca oofinta ballamaha iyo wanaajinta waxa aynu qabanayno! Waxa ka qaybaha Amaanada Qalinka awooda badan iyo carrabka af-tahanka ah ee gacanta ugu jira Qof Qoraaga ah. Haddii ayna u adeegsan in ay ku diidaan xumaha kuna faraan wanaaga oo ay dadka ugu yeedhi waayaan waa ay khiyaameen Amaanadii. Ha u fiirsado mid kasta oo ah qoraa, Abwaan, Saxafi, iyo khadiib Qalinkiisa iyo waxa uu ummada u soo gudbinayo.

Jidka is badalka

Waxa aynu ka cabanaynaa googa'a ummadeenna iyo cadawga iskugu keen habar wacday, maxaynu wax iskaga dhicin waynay innaga oo dhan? Maxaynu ilaahay gar-gaar uga dalban waynay? Maxaynu ugu guulaysan waynay Raacista sharcigeenna? Waxa aynu doonaynaa in uu ilaahay inna badalo Laakiin wadadii is badalka kuma sugnin. (إن الله لا يغير ما بقوم حتى يغيرو ما بأنفسهم) "ilaahay cidna ma dooriyo ilaa ay iyagu dooriyaan Nafahooda." Miyaynu doorinnay

annagu Nafaheenna? Miyaynu Rabbigeen ku raali galannay is badalkeenna?

Qadiyadda Falastiin iyo Masaajidka Aqsa. Waa qadiyad Muslimiintu leeyihiin dhamaan. Maxaynu haddaba iskugu yeedhi waynay si dhamaan ay u difaacaan iyaga oo wada jira? Maxaynu uga dhigaynaa Qadiyadda Falastiin Qadiyad ay leeyihiin Carabta oo qudha! oo aynu uga dhigi waynay Qadiyad Muslimiinta dhex-taal! Oo ay u difaaci waayeen Malyuun Muslimiin ah! Tijaabadu waa caddaynta ugu wayn. Awoow-yaasheen tijaabo ayay sameeyeen annaguna tijaabo ayaynu samaynnay, waxa ay tijaabiyeen in ay ilaahay dartii I shaqeeyaan oo ay ilaahay jidkiisa u dagaalamaan, oo ay ilaahay ereygiisa kor-yeelaan. Markaas ayay hanteen oo ay ka taliyeen dhulka la dagan yahay Bari iyo Galbeedba Saddex Qarni gudahood. Innaguna waxa aynu tijaabinnay in aynu ka fogaanno Diintii ilaahay oo anu qaadannay Xeerer kale oo ay inoo dajiyeen dad innaga oo kale ah. Markaas ayay innaga xoog bateen kuwii ummadaha ugu liitay oo ah Yuhuud.

Garo Naftaada

Naftu waa sida Wabiga socda oo kale. Dhibic Roob ah ma joojiso. Ilbidhiqsi qudha ma joogsato. Mar hore ayay u socotaa marna gadaal ayay u noqotaa waa mashluuq is badal badan. Ilbidhiqsi kasta Naf ayaa dhalata midna waa ay dhimataa.

Adiguna ka mid ayaad tahay mid dhintay ayaad tahay ama midka dhashay. La doon waligaa Naftaada in ay noqoto mid dhamays tiran oo hore u socod leh. Wakhti kasta waxa adduunka ku soo biiraya mid adiga kaa wanaagsan ha odhan “ma awoodo.” Wakhti kasta waa ay baahan tahay mana dareento dhamaystiran. Waxa ay ka dhigasaa wax kasta wax adag oo aan la heli Karin sida ay u adag tahay in uu riyoodo qof soo jeeda oo aan seexan. Waxa ay jeceshay Naftu wax kasta oo aanu ku jirin hore socodkeedu. Waxa ay jeceshay in ay soo jeedo oo ay habeenkii dhafarto subixiina ay iska seexato. Naftu waxa ay jeceshay wax kasta oo caado xun ah oo ay barato in ay qabatinto oo ay joogtayso. Haddii ay barato cabbista Khamriga in aad ay joojiso waa ay neceb tahay waxa ay jeceshay in iska wadato. Laakiin naftaada haku o dhan “waxaan ma awoodo mana iska joojin karo waad awoodaa waanad iska joojin kartaa.”

Baro Naftaada oo dhex quus siraha ku duugan ee aanad ogayn, oo is waydii waa maxay Naftu? Waa maxay Garaadku? Waa maxay Noloshu? Waa maxay Cimrigu? Xageen u socdaa ee ay tahay Noloshayda danbe. Ha hilmaamin qofka Naftii gartaa waxa uu gartaa ooo kale, Rabbigii waxa uu gartaa macaanka ay leedahay Noloshu. Ciqaabka ugu wayni waxa weeyi in aad hilmaanto Naftaada.

Goorma ayaynu Nafteenna ku kalsoonaanaa?

Waxa aynu dareemannaa mar uu mid kasta oo aniga mida uu dareemo awooda Naftiisa ee uu iska dhaafo in uu cid kale wax ka sugo oo uu rajo ku nool noqdo. Waxa aynu Nafteenna ku kalsoonaan marka aynu innagu dajisanno Qawaaniinta aynu Nafteenna ku horumarinano. Waxa aynu dareemannaa wakhtiga aynu Bulshadeenna gaadhsiino jidka maaranka ay ka maarmaan gacmaha cid kale. Waxa aynu helaynaa kalsooni Nafeed wakhtiga aynu noqonno dadka Reer Galbeedka ka aqbala waxa wanaagsan kuna diida waxa xun. Waxa aynu kalsooni buuxda helaynaa wakhtiga aynu Baadilka baadil u aqoon sanno haba lagu sameeyo Bariga. Waxa aynu kalsooni helaynaa wakhtiga ayny xaqa xaq u garanno haba lagu sameeyo Gacmaha Reer Galbeedka (Reer Yurub) waxa aynu kalsooni halaynaa wakhtiga aynu garanno in aynu nahay Ummadii xadaaradda iyo ilbaxnimada asalka u lahayd oo aynu dadka u sheegno inagu cidda aynu nahay. Waxa aynu kalsooni isku qabaynaa wakhtiga aynu innagu ka tashanno masiirkeena midka dhulkeena, Diinteena, Dadkeena, oo ay naan noqon “Dameeri dhaan raacday.” Wakhtiga aynu yeelano midnimo ayay arkaynaa kalsoonida Nafaheena iyo midka jiritaankeena. Wakhtiga aynu garano isha uu ka soo burqanayo wax soo saarka Reer Galbeed in uu yahay xadaaradeenii la inaga dhacay wakhtigii aynu seexanay hurdada dheer ee ay inaga

faa’iidaysteen. Waxa aynu kalsooni arkaynaa goorta ay inaga soo go’do waxa jiritaankeena taabanayaa wakhtiga aynu garanno cidda aynu nahay. Qof aan aqoon cadawgiisa waa ay ku adag tahay in uu ka guulaysto. Marka hore waa in aad barataa cadawgaaga in k badan Naftaada. Waxa aynu kalsooni Nafeed gaadhanaa wakhtiga aynu soo noolayno wanaagii islaamka waxa ay dhexdeeda ku faafto cadaaladda Bulsheed waxa aynu fahanno xadaarada iyo mudnaanta ay leedahay Diinta islaamku.

Mustaqbalka

Anigu waxa aan ku noolahay waxba la’aan, waxa aan ku noolahay tagto hore xusuusaheed, mustaqbalka rajo ayaan ka qabaa, laakiin joogtadu waa isku mid. Shalay waa ay galbatay soo noqodna warkiisa daa musqalkuna waligii iman maayo. Mustaqbalku mee? Ayaa awooda in uu gaadho Mustaqbalka?

Habeen ayaan fadhiistay ka mida sanadkii dhamaaday, waxa aan fadhiistay Balakoonka gurigayga, oo ku yaal xaafadda (Acdamiya ee Baqdaad). Waxa aan ku dhadhabayay mustaqbalka sanadkaas oo aan lahaa mustaqbal wanaagsan. Midkaas oo aan rajo wayn ka lahaa oo aan darteed u soo hal-gamay sidii aan u gaadhi lahaa. Wakhtigii aan gaadhay rajadii waxa ay noqotay wax jooga ah oo aan macno buuran ii samayn, haddana waxa ay Nafti igu boorinasaa in aan u xidh-

xidho raadinta wax kale waxa aan noqday sidii “Dibigii u ordayay sidii uu u gaadhi lahaa Baaldiga xashiishka ee uu arkayay isiga oo dhudhun u jira.” waxa aynu wakhti badan ku bixinaa sidii aynu u gaadhi lahayn rajo aynu leenahay, laakiin wakhtiga aynu gaadhno waxa ay noqonasaa wax iska caadiya oo Nolosha ka mida.

Dhalashadaydii.

Maanta waxa aan eegay warqadda dhalashadayda, waxa aan ku arkay in aan garaacayo irridaha sodomaadka. Waxa aan ka tagay shaqadaydii oo waxa aan iska fadhiistay meel. waxana aan ka fikirayay maxaan ka bartay soddonkaa sano ee aan soo noolaa?

Waxa aan ka xasuustaa oo qudha waa xusuuso maankayga rog-rogaya kamaan faa’iidaysan magac qudha oo dhex galay waddamada mooyaane wax kale. Iyo in ay qaar dadka ka midi dusha iga saarayaan amaan ay igu qurxinayaan iyaga oo hilmaansan xumaantayda. Qaar kale waxa ay dusha iga saarayeen cay iyo dhaleecayn iyaga oo hilmaansan intayda wanaagsan! Shaleetadaydee!!! Miyaan ogoodo in ay tahay Noloshu sidii Caagad biyo ah oo Badda dul socota, mar kasta oo ay madhan tahayna dabaalanasaa. Mar kasta oo ay buuxdana Badda quusaysa!

Waxa aan ahaa mid wax badan akhriya ileen waxa aan ahaa mid Nolsha wax ma garato ka ah e. markii aan wax ka bartay Nolosha mar danbe cidhiidh kumaan dareemin akhrinta iyo in aan wax baadho. Waxa aan is waydiinayay maxaan wax u akhrinayaa waxa aan warcelin u helayay in aan wax ogaado aan ka mid noqdo dadka aqoonta leh. Haddana waxa aan ogaanayay in ay Noloshu dagaal kula jirto dadka aqoonta iyo maamuus ka leh. Dadkuna sidoo kale ay dagaal kula jiraan dadka wax badan og ileen dadku waa caruurtii Nolosha dhashay e. waxa aan ogaaday in dadku soo dhawaystaan oo uu si maamus leh ugu dhex noolaado midka laba wajiila ah! Oo uu ku dhex dhinto midka run lowga ah ee sharafta leh isaga oo sabool la liido ah! In ay maamuuska sare helaan ayaan ogaaday dadka danaystayaasha ah. Waxa aan ogaaday in suuqyada sharafta iyo maamuusku mar kasta ay cidlo yihiin aan cidi joogin. Laakiin suuqyada laba wajiilenimada iyo Liidashadu ay yihiin kuwo camiran oo wakhti kasta la joogo!

Alla miyuu! Ka guulaysto midka tabarta darani midka xoogan. Alla miyay ka guulaysato aqoontu xoolaha!

Maxaan wax akhrinayaa oo aan wax u baranayaa oo aan mid maamuusan u noqonayaa?

Waa aan is taagay waxa aan boodhka ka jafay qaab-socodka Noloshaydii. Waxa aan ogaaday in aan khasaaray 30-sano oo ka mida Noloshayda oo ah Ubixii cimrigayga iyo gugii Noloshayda waxba maan faa’iidin!

Maxaynu wakhtiga cidhiidhi ugu dareenaa?

Maxuu cidhiidhi ugu dareemaa midkeen Nolosha haddii uu waayo waxii uu rabay? Maxaynu culays ugu dareenaa saacadaha aynaan waxba gacanta ku hayn? Muxuu in aynu wax sugno inoogu adag yahay? Muxuu midkeen uga baqaa in uu Naftiisa la gaar noqdo?

Naftaydu ma cadaw ayay igu tahay aan isku dhaafiyo in aan Buug akhriyo si aan Naftayda uga baxsado! Ama waxa aan wakhtiga ku luminayaa in aan qof kale la sheekaysto aniga oo ka baqaya Naftayda! Maalmuhu waa gun-dhiga cimriga haddaba maxaan cimrigayga ugu dilayaa in aan isku mashquuliyo wax aan faa'iido ii lahayn iyo in aan ka fikiro wax aan waxba iga soo galayn aakhiro iyo adduunka midna.

Waydiimahaas waxa aan warcelintooda ka helay in ay sababtu tahay in uu iimaankaygu dabar-yareeyay. (daciifay) haddii uu ahaan lahaa iimaankaygu mid buuxa waxa aan weheshan lahaa in aan ilaahay la sheekaysto oo aan kor u qaado dareemayaashayda gudeed ee dhinaca (Ruuxiga ah) haddii aan sidaa samayn lahaa maan dhibsadeen in aniga iyo Naftaydu aanu isku kali noqo. Bal waxa aan ilaahay ka baryi lahaa in uu I siiyo wakhti badan oo aan Isaga garab iyo gaashaan aan ka shigto aan kaga gabado falaadhaha Ibliiska. Laakiin waanta waa hadak qudha ee wakhtigaasi ii soo laaban maayo! Ilaahay waxa aan ka rajaynayaa in uu iska kay cafiyo.

Dhalanteed

Waxa aan ahaa wakhtigii dhallinyaranimada mid ay Naftiisa buuxisay dar-darta dhallinyaranimo, waxa aan ahaa mid wax badan qora aniga oo jecel in aan (caan) noqdo Bulshada ka dhex muuqda. Waxa aan qori jiray Maqaallo aan faafin jiray wax macaash ah kuma doonayn adduun kale iga soo gali jirin, waxa aan ku dadaali jiray in aan faafiyo waxaa aan qoroyo. Haddii aan arko in ay faaftayda waxa qalbigayga buuxin jiray rayn-rayn iyo qanaaco aan gudaha Naftayda ka dareemo.

Haddana waxa aan gaadhay in aan macaash ku helo waxa aan qoro ee aan faafiyo oo uu adduun badan iga soo galo waxa aan gacantayda ku qoro oo aan gaadho cannimadii iyo magacii aan jeclaa. Laakiin waxa uu ahaa **dhalanteed**! Ilaahay ayaan ku dhartee waxa uu ahaa dhalanteed. Magaranasaan dhalanteed? Haddii aad marayso meel banaan oo Ban ah waxa aad ka arkaysaa hortaada wax aad moodo Biyo meel fadhiya balse mar aad gaadho waxa aad arkaysaa in aan wax Biyo ah aanay jirin meeshaas. Waxaas ayaa la yidhaa Dhalanteed. Caannimadu waa taas oo kale. Waxa aan wax qori jiray aniga oo Buuni ku ah (khabiir) waxa aan qoroyo, waxa aan noqday in ay magacayga yaqaanaan Malaayiin dad ah. Waxa loo afnaqay

(Tarjumay) maqaaladii aan qoray luuqado badan sida Faarisiga, Urdigina, iyo Ingiriisiga. Waxa iga soo gaadhay qaybo badan oo ka mida qaaradaha adduunka dad badan oo ka soo falceliyay maqaaladaydii gaadhay ama ay akhriyeen. Haddaba maxuu ii taray wanaagaas ay igu sheegayeen haddana maxaan gacanta kaga hayaa? Maxay ii tartay amaanta iga soo gaadhay Malaayiin dad ah? Anigu waxa aan hadda kali ku ahay Gurigayga! Waxa I majeeranaya Malaayiin dadka ka mida waxa igu tilmaamayaan in aana ahay suugaan-dhaadhigii carbeed. Waxba iga dhimmi mayso in ay Malaayiin ka mida dadku igu tilmaamayaan in aan ahay Daacigii waynaa waxbana ii taramayso in ay igu tilmaamayaan in Aqoon laawihii ugu waynaa! In ay i hadal hayaan iyo in aanay carabkooda igu soo qaadin labaduba midna waxba i tari mayso Maanta!

Xaqiiqada qudha ee laga dheefo suugaan yahannimada ama qoraalka, waa kaliya in uu ilaahay amaal-marin kaa siiyo wanaagaas aad ummadaada u soo gudbinaso. Ilaahay ayaan ka rajaynayaa in uu abaal-marintaas I siiyo. Waxa aan ka helay maqaalka ka mid maqaaladii aan qoray mid ka mida saddex-kun oo Liiro. Waxa ka mida Maxaadiro aan ka qabtay (ka helay) kun Liiro. Lacagtu maaha dhalanteed. Laakiin maxay samaysaa Lacagtu? Abaal-marinta ugu way nee uu helo addoonku waa abaal-marinta ilaahay! Wixii ka soo hadhay waa (mid dagan raaxadii) waxa intaas ka soo hadhay waa dagnaan aynu dagayno Nafaheenna aynu is waydiino haddii aynu adduunkan ka hayaano maxaa ina raacaya? Jawaabtu waa camal

wanaagsan oo aad ilaahay dartii u samaysay. Wixii intaas ka soo hadhay waa dhalanteed.

Waxa aynnu nahay muslimiin.

Waxa aynu ku indho-qaadnay Kuufa, Basra, Qaahira, Baqdaad. Waxa aynu ku barbaarnay ilbaxnimadii islaamka ee ka jirtay Shaam, Andalus iyo dhamaan gayiga Muslimiinta. Waxa anniga mida Abuu-Bakar, Cumar, Saalixu-diin Ayuubi, KHaalid Daariq Qutaybah. Waxa innaga mida Raggii Taariikhda ku waaray ee ahaa, Bukhaari, Dabari, ibnu Taymiyah, ibnu Qayim, ibnu Xasmi, Ibnu Khalduun! Mid kasta oo ka mida waxa innoogu sugan ku dayasho iyo in aynu ku hiranno. Mid kasta oo iyaga ka midi waxa uu ahaa Seef ka mida Seefa Ilaahay ee galka laga saaray. Waxa innoo yihiin Garaadkii iyo Jidhkii aynu mugdiga kaga baxaynnay. Awoodeennu waxa ay ahayd iimaankeenna, sharteennu waxa ay ku sugan tahay gacmaheenna, kalsoonideenuna waxa ay ku jirtaa Rabbigeen! Waxa aynu nahay Muslimiin. Waxa aynu ka talinay adduunka waxa aynu ku beernay cadaalad, waxa aynu furannay dhulka waxa aynu ka yeelnay badhaadhe. Dhaqankeenna dagaal waa dabacsanaan! Diinteenu waa mid nabad-galyo waxa aynu nahay kuwii ugu wanaag badnaa ee dhulka ka taliya. Waxa aynu nahay kuwii sharafta u ahaa furashada. Waxa aynu nahay

Muslimiin, han-jabi mayno murugoonna maynno. Geesinimadu waa mid inagu abuuran naf hurnimaduna waa mid dhiigeenna raacday. Ku niyad jabi mayno socodka sanadaha iyo dhacdooyin gurracan. Waxa aynu leenahay dhulka Qur'aanku buuxiyay waxa aynu leenahay Minaaradaha dhaadheer ee addinka salaaddu ka baxayo! Waxa innoo sugnaaday Mustaqbalka haddii aynu Diinteenii u laabano. Waxa aynu nahay Muslimiin.

AKHRI!

Ereygii ugu horeeyay ee Qaanuunka islaamku waxa uu ahaa Akhri! (إقرأ) muu ahayn Dagaalan, muu ahayn Qaniimayso, muu ahayn Qabso. Diinta islaamku maaha Diin Dagaal, maha Diin Maal, mana aha Diin qabsasho. Laakiin waa Diin aqooneed fikir iyo Diin hanuun. Akhri, laakiin ha akhriyin magac Boqor, mid Amiir, mid Kooxeed. Laakiin akhri Magaca Rabbigaa. (إقرأ بسم ربك الذي خلق) ilaahay kumuu odhan Nabigiisa "akhri Magacii Quraysheed kumuu odhan akhri magaca Carbeed, ee waxa lagu yidhi akhri Rabiiga Quraysh iyo Caraba abuuray magaciisa. Diinta iyo Dacwadda Nabi Muxammed scw, waxa ay ahayd, mid loogu tala galay dhamaan ummadaha Jin iyo Insiba. Waxa ay hayd dacwadii ugu wayneed ee uu gaadho qof bashar ah. Waxa ay ahayd mid fure u ah Dhambaalada waaraya ee ilaahay u soo dhiibay Nabi Muxammed scw, kumay dadaalin dagaal

iyo Seef. Laakiin waxa ay ku dadaashay aqoon iyo in dadka la dhiso garaadkooda.

Luuqadda Carabiga

Luuqadaa carabigu: waa luuqadaha ugu dhamayska tiran Luuqadaha Dunida. Waana luuqadaha ugu balaadhan ee soo maray Taariikhda. Haku dagmin in aad ku arago Qaamuuska Muxiidka (المحيط) Lix kun oo eray Lasaanu carabka (لسان العرب) Sideed kun oo eray, oo aad Qaamuusyada Ingiriiskana aad ku aragto kumanaan kun. Middaasi waxa ay ka dhigan tahay Nin leh todoba caruur oo isagu uu dhalay. Iyo mid kale oo leh boqol caruur ah. Laakiin aanu isagu dhalin ee uu dhamaantooda uu ka soo qaatay waddaayinka. Waa farqiga u dhaxeeya Luuqadda carabiga iyo ingiriisiga. Sidaas darteed luuqadda carabigu waa waa asal aan guur-guurin, oo wakhtigan la jooga waxa aad fahmi kartaa haddii aad tahay qof carab ah ama yaqaan luuqadda carabiga gabayadii uu allifay Mahlaal iyo Cadi binu Sayid ee ay tiriyeen wakhtigii Jaahiliga ee islaamka ka hor. Miyuu fahmayaa qof ingiriiska ahi maanta gabayadii Shakasbiir (shekespeare) wixii ka horeeyay? Qof

faransiiska ahi miyuu fahmayaa wixii ka horreeyay Qarnigii 13aad.

Luuqaddiina Carabay.

Dhab ahaan maanta waxa aynu kaga sugannay Luuqaddeena, aqoon la'aan. Bal qof kasta oo inaga midi Naftiisa ha imtixaano. Oo ha akhriyo Qaamuuska Lasaanu-carab, oo ha is qiimeeyo inta ay joogto fahanka luuqaddiisa carabigu ha akhriyo toban Gabay oo ka mida Gabayada carbeed haddii uu si wanaagsan u fahmo isaga oo aan fiiran sharraxaadooda aniga ayaa khaldan. Anigu sheegi maayo mid inaga oo ah Suugaan-dhaadhi ku xeel dheer sugaanta ee waxa aan sheegayaa dadkeenna iska caadiga ah, haddii aad fahanto adiga oo aan wax khalad ah galin aniga ayaa khaldan.

Luuqadda carabigu waa mucjisada garaadka Basharka, ee layaabka Taariikhda oo dhan. Haddii ay taariikhdu ka hadasho luuqadaha oo wakhtiyadii ay bilaaabmeen iyo heererka ay soo mareen. Luuqadda carabigu waa ay ka horraysay xataa Taariikhda qudheeda. Cidi garan mayso wakhtigii ay bilaaban tay iyo heererkii ay soo martay xataa! Miyaa ay ka jirtaa adduunka maanta luuqada ay dadkeedu fahmi karaan Gabayadeedii la tiriyay 14-qarni ka hor? Oo ay u fahmi karaan sidii oo maanta la tiriyay! Miyaa ay suurogal tahay in baraha (ustaadka) ardayda Jaamacadda wax u dhigaya, ee baranasa

Sayniska, iyo Falsafadda in uu ka helo luuqada uu ugu dhigayo ereyo. Uu adeegsado maanta oo ay fahmayaan ardaydaasi sidii uu fahmayay qofkii noolaa 14-qarni ka hor! Amaba qarnigan Labaatanmaad. Miyayna ahayn xaaraan in aynu dayrinno oo aynu dayacno Luuqaddaas intaas muga iyo miisaanka leh? Oo ay luuqada ingiriisku ay leeqadiinii meesha ka saarto! Miyay nasiib-darro ahayn in ay aqoonyahankeennu maanta ay kaga sugan yihiin aqoon la'aan! Miyayna xaaraan ahayn in aynu carrabadeen ku sugno ereyo ingiriisi iyo Faransiisa ah innaga oo heli karna ereyo inoo buuxiya booskaas oo ah luuqaddeena? Carabay u noqda Luuqaddiina barta oo weeleeya. Faafiya oo Niyad-samaan ku qaba. Waxa ceeb ah in aynu leenahay Luuqaddaas oo haddana aynu kaga sugannay aqoon la'aan. Waxa nasiib-darro ah in aynu haysanno Luqaddaas haddana ay dayrinno.

Raacasho (mudaalaco).

Waxa aan doonayaa in aan idin tuso shay aad u macaan badan, faa'iido wayn leh. Oo cidda taqaanaana ay yar tahay waana Mudaalacada. Waxa aan soo tijaabiyay mac-macaanka oo dhan dhamaantood, maan helin wax ka macaan in aan Buug (kitaab) aad la gaar noqoto akhrintiisa. Haddii ay dadku leeyihiin Yoolal iyo Himilooyin Himilada ugu wayni Mudaalacadu waa Yoolka ugu wayn. Mudaalacada waxa u baahan dadka oo dhan gaar bartaha (ardayga) iyo baraha

(macallinka) waxa u baahan Gabadha oo ugu baahan in ay gurigeeda ku samayso. Midka safarka ku jira ayaa u baahan iyo midka nagiba. Sirtuna waa Buugga (kitaabka) aad dooranaso. Bugaagtu waa sida cuntada, mid waxtar leh ayaa ku jira waxa kale oo ku jir mid dhib ah. Waxa ka mida mid uu Subaggu ku badan yahay oo waxtar leh, laakiin ayna Naftu jeclayn in ay akhriso. Waxa ka mid ah mid sun oo dilaa ah. Waxa ka mida mid sun ah laakiin laguu macaaneeyay, oo qofka ku dagma macaankiisa ay suntiisu khaarajinaso! Qof wax kasta akhriyaa waxa u dhaca bur-bur garaad. Buugta waxa ka mida qaar Jannada lagu galo waxa kale oo ka mida qaar Naarta lagu galo. Haku baraarugo mid kasta oo inaga midi in uu waydiiyo dadka Buuniyada (culimada) ah iyo maan-shiilada uu ku kalsoon yahay waxa uu akhrinayo. Haddii kale ha iskaga tago Mudaalacada.

(ليس بعلم ما حوى القمطر ما العلم إلا ما حواه الصدر)

Madadaalo-garaad

Waxa ay u mareen in badan oo ka mid qorooyadu. Qorista Bugaagtooda qaab kasta oo ay ku dibin lahaayeen aqoonta ay sidaan. Waxa ay ku dadaaleen sidii ay ku kasban lahaayeen dareemaha akhristaha garaad ahaan, dareen ahaan, qaabka ugu mudan ee lagu gaadhsiin karo macluumaadka aad

doonaso akhristaha waa: in aad ka shaqaysiiso Garaadkiisa oo aad ku furto su’aalo iyo doodo is Burinaya si uu u xalkooda u raadsado waana haddii aad qorayso Buug fikir ah. Oo u baahan rog-rog badan.

Bare (macallin)

Saddex shardi ayaa looga baahan yahay si uu macallinku u Guulaysto. Kow: in uu si wanaagsan u fahansan yahay Maadada uu dhugayo. In uu akhriyo Buugaagta ka hadlasa nooca Maadada uu dhigayo. Waa in aanu ku koobnaan Buugga uu ka dhigayo oo qudha. Waa in uu ardaydiisa ku dhiirigaliyaa in ay soo akhriyaan Bugaag badan oo ka hadlasa mawduuca ay maadadiisu ka hadlaso. Uma habboona macallinka in uu ardayda ku yidhaa Buuggan oo qudha soo akhriya. Haddii uu sidaa sameeyana kuma habboona macallin Jaamacadeed in uu sidaa yidhaa ee waxa uu ku habboon yahay falkaasi macallinka dugsiga barbaariinta. Laba: in uu u maro waddo kasta sidii uu ardayga u fahansiin lahaa waxa uu barayo. Haddii uu mas’alada ku sheego qaab aanay fahmayn ardaydu waa in uu badalaa qaab-socodkaaas ayna ardaydu fahmayn. Waa in is badal ku sameeyo Ereyada uu adeegsanayo. Waa in uu badalaa isku xidhka weedhaha iyo qaab-dhacooda. In uu noqdo Bare (macallin) dabacsan haddii uu garan waayo waa in uu ku yidhaa ardayga (garan maayo) haddii uu qaldamana waa in uu ku yidhaa Ardayga “waan qaldamay.

Ka daba-tagga.

Ka daba taggu waxa uu ii noqday dhaqan iyo caado aan leeyahay. Waanan ogahay in ay tahay caado. In aad kolba ka daba tagto hadalkaagii hore. Waana caado xun oo aan jeclaan lahaa in aan iska fujiyo balse aan awoodi waayay. Haddii ayba ka mid tahay wax yaabaha xaaraanta ah waxa aan ku karahsadaa Naftayda sidii aan iskaga dhaafi lahaa. Wakhtiga aan ka khudbadaynayo Goob wayn, ama aan ka hadlayo Idaacadda, ama aan ka soo muuqdo TV-ga hadalka aan jeedinayaa dhamaan waa gole-kafuul. Hortaydana ma taal Warqad aan ka akhrinaya. Sidaas darteed waxa wakhtiyada qaar iga dhaca khalad. Wakhtiga aan dhameeyo hadal jeedinta ayaan dib u raac-raacaa waxa hadalkayga waxa aan u dul istaagaa sida uu u dul istaago Dameerku Odoyga Sheekha wakhtiga dhibka.” Mana sheego xagee ayaan ka keenay xagee ayaana loogu noqonayaa! Ha i waydiin muxuu ahaa Sheekhan Dameerku istaajiyay. Waa tusaale ku waaray uun Taariikhda waanan Hilmaamay Macagii Sheekha. Magacyda ku waara Taariikhda kuma tusinayaan waynaanta caddii lahayd magacan.

Nabi Muxammed. ﷺ

Gabood-falka waxa ka mida, in ay ka dhigno Nabi Muxammed. ﷺ. In uu yahay in uu yahay mid ka mid dadka waa wayn ee Taariikhda soo maray. Ee waa midka ugu wayn ee Taariikhda soo maray. Ilaa intii ay dhalatay Taariikhdu. Waa midka qudha ee kulansaday qaybaha Taariikhda dhamaanteedba. Waa midkii u ogolaaday asxaabtiisa in ay baahiyaan wax kasta oo ay ku majeertaan. Waa midkii ay inoo soo wariyeen asxaabtu Goob kasta iyo Goor kasta oo uu ku sugnaa. Awood iyo awooddo darraba dhamaanteedba. Wakhtigii uu cadhaysnaa, wakhtigii uu wax jeclaysanayay, wakhtigii uu daganaa. Waca ay inoo wariyeen ooriyihiisii wax kasta oo uu ka qaban jiray Gurigiisa, Caa'isha RC. Waxa ay soo warisay wax kasta oo uu ka qaban jiray Gurigiisa. Ileen wax kasta oo uu samayn jiray waxa ay ahayd Diin iyo Shareeco. Bal ii tusa mid sidan loo dhawray Sooyaalkiisii Taariikheed. Oo la garanayo wax kasta oo uu samayn jiray iyo dhacdo kasta oo uu la kulmay! 14-qarni ka dib.

Waynaantu mar waxa ay noqotaa dhaqanka iyo qofnimada shakhsiyeed iyo tilmaamaha uu leeyahay qofku. Marna waxa ay noqotaa waynaanta waxa uu qabtay iyo hal-abuurka uu la yimi, marna waxa ay noqotaaa Raadka uu kaga tagay ummadiisa iyo dhamaan Taariikhda Basharka. Qof kasta oo wayn dhinacyadaas ayaa laga qiimeeyaa. Laakiin waynaanta Nabi muxammed ﷺ. Waxa ay koob-satay dhinac walba oo ka mida qaybahaas. Waxa uu ahaa mid ku tilmaamaan Hal-abuur wayn, raadayn wayn, oo uu ku leeyahay dhamaan dhagaha Basharka. Gaal iyo muslimba.

Abuu-Bakar. رَضِيَ ٱللَّـٰهُ عَنْهُ،

Midkee ayaa ka dhamaystiran Taariikhda Abuu-Bakar.! Waa Taariikhada ugu dhamayska tiran Taariikhda islaamka. Marka laga yimaado Siirada Nabiga. Scw, waxa ay koobsatay wax kasta oo Qurux badan. Waa Taariikh uu la yaabayo ninka Maan-shiilka ah wakhtiga uu akhrinayo, waxa uu is waydiinaa ma qof ayaad Taariikhdiisa akhrinasaa mise Qaamuus ka mida Qaamuusyada. Waa buuni ku xeel-dheer Tafsiirka Qur'aanka iyo axkaamtiisa. Garan maayo Taariikh Bashar oo ka dhamaystiran Taariikhda Abuu-Bakar. Waxa aad la yaabasaa sida ay ugu kulantay Sidiiq wanaag oo dhan oo lagu majeerto qof. Waxa ay ahayd Naftiisa Bad dhibirsan oo uu ilmaha yar ka darsano biyaha wakhtiga uu doono, waxa uu ahaa Bad aan lahayn Qar-qoon iyo Mawjado is riixaya. Waxa uu ayaa Bad ay gunteeda ku jirto Dahabka ugu qaalisan. Sida Jawhar iyo Luul.

Cumar binu Khadaab. رَضِيَ ٱللَّـٰهُ عَنْهُ،

Mar kasto oo aad, qad u raacato (baadho) wararka Cumar binu Khadaab, waxa kugu waynaanaya la yaabkiisa aad ka arkayso. Waxa aan akhriyay kumanaan muslimiin ah, wali maan arag mid la mida Cumar binu khadaab. Waxa aad arkay in uu yahay mid ku tilmaaman Akhlaaq waynaan, iyo in uu ka tagay Raad wayn. Waxa uu kulmistay waynaan oo dhan. Waxa ku soo arooray Fadliga Cumar Binu Khadaab. Xadiithkan.

(لَقَدْ كَان فِيما قَبْلَكُمْ مِنَ الأُممِ نَاسٌ محدَّثونَ، فَإنْ يَكُ فِي أُمَّتي أَحَدٌ، فإنَّهُ عُمَرُ) {رواه البخاري، ورواه مسلم)

“Waxa ahaaday ummadihii idinka horreeyay qaar ay iskaga sheekeeyaan. Ummadayda waa Cumar binu Khadaab.”

Waxa kale uu Nabigu ku yidhi. ﷺ

(يا ابنَ الخطابِ ! والذي نَفْسِي بيدِهِ ما لقِيَكَ الشيطانُ قطُّ سالكًا فجًّا ؛ إلَّا سلَكَ فجًّا غيْرَ فَجِّكَ) «

"Ina khadaabow waxa aan ku dhaartay ilaaha ay gacantiisa Naftaydu ku jirtee haddii uu Shaydaanku kula kulmo wadiiqo (dariiq) adiga oo socda, waxa uu ka laabaa dariiq kale.”

Waxa soo dagi jiray Waxyiga isaga oo waafaqayaa artiyaha Cumar binu khadaab.

Wadaadkii Dumishiq.

Masar waxa ay haystay sheekh Dimishiqi ah, oo halkaas daganaa oo ka noqday Gar-soore. Iyo in uu ka khudbadayn jiray Masaajidka Jaamica. Waxa uu ahaa Wadaad Qalbigiisa iimaanku buuxiyay oo aanu dhagaxu leexinayn. Waxa uu ahaa wadaad og Bulashadii uu diyaariyay Nabi Maxammed scw. Waxa uu furtay dhul badan. Naftiisu waxa ahayd mid ku suntan Geesinimo iyo raad wayn oo uu kaga tagay Bulshada muslimiinta. Waxa uu Nafta u huray Difaaca Diin ilaahay, ileen Naftiisa waxa ku jiray iimaan awood darrada u ragaya awood saboolnimada ka dhugaya hodonnimo. Maalin ayuu u dhawaaqay reer Masar waxa uu ku yidhi “Reer Masarow sugma oo dagaalama, anna Janno ayaan idiin balan-qaaday.” Waxa ay ku jabiyeen Reer masar hadalkaas Gulufkii (ciidan) Tataarka. Kuwaas oo ahaa Rag cidi loodin wayday oo dhul badan oo dadkii daganaa cagta soo mariyay. Kalsoonidaas waxa hoggaan u ahaa wadadkii Reer Dimishiq. Sidaas ayay ku Guulaysteen oo ay ku difaaceen Diintii ilaahay oo ay ku badbaaday xadaaraddii muslimiintu. Sidaas ayaa Tataar cagta loo miriyay Dagaalkii Caynu jaaluut. Sidaas ayay kaga mid noqotay Sil-siladihii lagu difaacay Diiinta ilaahay. Sida Badar, Qaadisiya, Yarmuuk, iyo Xadiin. Sidaas ayay kaga Guulaysatay Masar Tataarkii. Sheekhaasina waa Cisu-diin ibnu cabdisalaam.

Qaraaquush.

QaraaQuush: macnaheedu waa Halyay marka la eego Luuqadda Turkida. QaraQuush waxa uu leeyahay sooyaalka wayn oo Taariikh ah. Mid waa mid been-abuur ah oo ay sameeyeen dadkii Cadawgiisa ahaa ee ka soo horjeeday. Iyo sooyaal Taariikheed oo Run ah. Laakiin layaabku waxa uu yahay waxa ay dadku hilmaameen Taariikhdii Runta ahayd waxa ay haystaan mid waxba kama jiraan ah. Qaraaquush waa kuma? Waa halyay ka mida halyayadii uu huggaanka u ahaa Saalixu-diin Ayuubi. Waxana uu ahaa Raggii ugu dhawaa waxana uu ahaa Hoggaamiye halyaya ah. Waxa uu ahaa askari aamin ah. Layaabka waxa ka mida dhinaca amaanadiisa marka laga eegayo, waxa uu u dhiibay Saalixu-diin Ayuubi. In uu ilaaliyo Qasarkii Dawladii faadumiyiinta. Markaas ayuu Qaraaquush waxa uu eegay Hortiisa waxa uu arkay, nooc walba oo ka mida Dahabka iyo macdanta middeeda ugu qaalisan oo hortiisa dhooban oo dhinac walba ka karooran. (Buuxda) waxana uu ahaa Qasriga Faadumiyiintu; mid aan tusaale la mida adduunka laga soo helayn. Waxa uu ahaa mid ka samaysan Dahab iyo Jawhar. Haddana ninkaas aaminka ah kumuu mashquulin dhal-dhalaalkaas adduunyo ee waxa uu sideeda uga soo baxay Amaanadii lagu aaminay iyo xilkii la saaray. Wakhtigii uu is maan-dhaaf dhex maray dhashii Salixu-

diin Ayuubi ee ayba ku sigteen in ay is dagaalaan, Qaraaquush waxa uu ahaa mid ka shaqeeya sidii uu is maan-dhaafkaas meesha uga saari lahaa xal waarana loo gaadhi lahaa.

Dimishiq.

Dimishiq! Miyaan tilmaamaa Dimishiq? Sidee ayuu u tilmaamayaa Jannada qof aan arag! Waa riyo ka mida riyooyinka ugu quruxda badan. Waa hoyaga Geesinimada iyo mudnaanta. Dimishiq waxa ay ka mid tahay Magaalooyinka adduunka ugu wayn uguna quruxda badan. Ugu dagan ugana saxan-saxada macaan. Ugu Biyaha macaan. Ugu dhadhanka macaan dhinaca cuntada. Ugu aftahansan dhinaca hadalka. Dadka daganina ay yihiin dadka ugu deeqsisan dadka adduunka. Dhexdeed waxa yaal aqoontii iyo suugaantii! Ilaahay ka cabsi iyo wanaag! Waxa yaal qurux iyo rayn-rayn oo dhan. Dimishiq waxa ay ka mid tahay magaalooyinka dhulka dul-saaran kuwa ugu da'da wayn ee ugu balaadhan dhinaca xadaaradda. Waxa ay jirtay intii aanay Dhalan Baqdaad iyo Qaahiri. Baariis iyo Landhan. Intii ayna la bilaabin Ahraamta Masar. Waxa dhexdeeda yaal wax kasta oo qurux badan. Beero, Bustaanno, Masaajid, Dhir iyo cagaar oo dhan. Marka laga reebo Badda mooyaane. Wax kasta oo ay ishu qabataa waa ay dhex yaallaan. Dimishiqdii aan aqaanay aniga oo yar

maaha midda maanta aynu naqaan. Waxa is badalay wax kasta oo dhexyallay Barburka ku dhacayna waa mid ku xardhan Sooyaalka Taariikhda. Adduunka dhexdiisa waxa ahaaday Magaalooyin tiro bada, oo qurux badan. Laakiin Dimishiqa waa midda ugu quruxda badan marka lagu eego indhaha dadkeeda, haddana ay xumeeyeeen dadkii. Laakiin maya Dimishiq waxa dhax yaal wanaag faro badan, oo aanay aqoon caddii ku noolaatay mooyaane. Dhiman mayso Dimishiq Eebe idamkii iyo awooddii.

Baqdaad.

Baqdaad wakhtigii ay ugu quruxda badnayd waxa, uu ahaa wakhtigii uu ka talinayay Boqorkii Haaruun Al-rashiid. Oo ahaa wakhtigii dahabiga ahaa (العصر الذهب) Waxa uu odhan Haaruun Al-rashiid. “Daruuraha, daruurey ku hoor meesha aad doonta waxa noo iman doona waxa aad soo saarto. Waxa is taagay habeen Haaruun Al-Rashiid waxa uu soo qaatay Biyo markaas ayuu ku shubay gacanta sheekhii waynaa ee Macaawiye Al-dariir. Markaaa ayuu ku yidhi miyaad garanasaa cidda gacantaada Biyaha ku shubaysa? Markaas ayuu yidhi maya.

Markaas ayuu yidhi waa Boqorkii waynaa ee Haaruun Al-rashiid! Markaas ayuu la yaabay falka uu sameeyay Boqorku markaas ayuu ku yidhi isiga oo gacmaha maydhanaya, “Cilmiga iyo dadkiisaba waad maanuustay.” Sidaas ayay ahaayeen Boqorodii iyo culimadeennii hore.

Waxa aya ahayd Baqdaad hooyadii il-baxnimada iyo xadaarada. Waxa ay gaadhay meel aanay gaadhin Rooma wakhtigii suldaankeeda. Waxa ay gaadhay meel aanay gaadhin Qusdandiinaya. Waxa ay gaadhay meel aanay cidi kula loollami karin wakhtigeedii oo aanay gaadhin magaalo kale oo ka mida adduunka. Waxa ay noqotay Boqorodii magaalooyinka. Dhinaca wax soo saarka wax kasta oo ka soo baxa dhulka kale waxa loo soo qaadi jiray Baqdaad. Waxa soo gaadhi jiray wax kasta oo ka soo go’a Bariga dhexe.

Waxa ay dhimatay Baqdaad. Wakhtigii Cabaasiyiinta ee ay tageen dhallinyaradeedii waa la burburiyay dhufaysyadeedii ee ay kharaabiyeen wuxuushtii Tataarku ee uu hoggaaminayay Hoolaakoo. Waxa la gawracay oo dhagta dhiiga loo daray. Culimadeedii, madaxdeedii, dumarkeedii, iyo caruurteedii. Waxa Seefta lala dhex socday 40-cisho oo xidhiidh ah. Waxa ay gaadheen dadkii ku dhintay (malyuun) qof! Kutubteediina waxa lagu guray wabiga Dajla. Halkaas ay ku baaba’day wax soosaarkii garaadkii reer Baqdaad halkaas ayaa lagu waayay hal-abuukii reer Baqdaad. Halkaas ayay ku duntay oo ay ku

gob-lantay Maktabaddii ugu wayneed ee ay lahaayeen muslimiintu. Waxa ay masiibo ka mida masiibooyunka waa wayn. Oo ku habsatay reer Baqdaad iyo dhamaan Muslimiinta. Sidaas ayay Baqdaad ku ahayd muddo kharaabado oo aan cidi ku noolayn!

Nabad ahow Baqdaadey! Waxa aan ku qori doonaa sheekadaada mar kale xaashiyaha awoodda, aqoonta, iyo sharafta.

Qayb Jannada ka mida.

Uma jeedo Jannadii aakhiro, umana jeedo Shaam, uma jeedo Lubnaan. Laakiin waxa aan u jeedaa Jannadii adduunka! Cidda arag tay waxa ay og tahay in aan hadalkaas ku run sheegayo. Cidda aan aragna waa ay maqashay. Laakiin ka wax arkay lama

mid aha ka wax maqlay. Gar miyaa in la yidhaa “wakhtigii Nabi aadan, dhulka loo soo dajiyay waxa lagu soo dajiyay dhulka hadda loo yaqaan siiroolaanko halkaas oo ay quruxdeedu ka soo ifbaxday, illeen wakhtigii Nabi aadan, jannada laga soo saaray waxa ku soo kan-kamaysay udugtii Jannada. Ka dibna sidaas ayay ku noqotay Jannadii dhulka. Sidaas maxa laygu yidhi!

Waxa ay ahayd Daaqadda Tareenku mid ay Qurux oo dhami ka soo burqanayso laba daymo ee isku lamaan waa kala jaad mar kasta oo aad jeleecdu Daaqadda waxa aad isha la halacsanasaa qurux ka mug iyo miisaan wayn middii hore. Waa eegmo ku gaynasa Beerihii Hindiya iyo wadiiqooyinkii Basra. Marka aad daymooto waxa aad arkaysaa oo aad ku xusuusanasaa Baqdaad iyo cagaarnaantii Shaam! Waxa aaf arkaysaa Buuro iyo Wabiyo isku dhafan oo oo aan tiro lagaga bogan karin. Saacad qudha waxa ay ishaydu ku dhacday 17-wabi oo isku xiga! Waxa uu ahaa Tareenkan aan saaranahay midu samaynsan qaab casri. Waxa uu jarayay saacadda qudha masaafo dhan 60-kiiloomitir. Waxa aannu soconnay 800-boqol oo kiiloo-mitir. Tuulooyinku waa ay xidhiidhsan yihiin mid qudha ma arkaysid meesha ay ka bilaabanto iyo meesha ay ku dhamaato. Guryuhu waxa ay ka samaysan yihiin looxaanta ay caruurtu ku ciyaarto.

Waxa aan ku arkay waxa ugu layaab badnaa! in uu Tareenku nala soo marayay Bariish dhex fidsan laba Buurood dhexdeeda oo marka aad madaxa daaqadda Tareenka kala dhacdo aad arkayso. Wabiyaal iyo Bustaanno aanad indha ka qaadayn quruxda iyo cagaarka ka muuqda iyo wax soo saarka hadheeyay ee aan lahayd meel bannaan! Iyo caruurta yar-yar ee ka shaqaynaya. Meeshaas sidaas ah waa Jasiiradda Bilicda iyo quruxda ee Indunuusiya.

Qadiyad muslimeed.

Dayicidda Falastiin waa danbi wayn oo ay xukumi doonto maxakamadda Taariikhdu. Wakhtigii ay ka gaabiyeen war-gaysyadu in ay wax ka qoraan ee ay ku hareeraysan tahay Falastiin mooganaanta ku dhacday muslimiintii! Waa ay faydmi doontaa mooganaanta maanta ku daahan wakhtiga ay Taariikhdu ka qaaddo Daaha maanta saaran. Waana laga la xisaabtami cidda ka mas'uulka ah. Haddii ay adduunka ay ka dhaci waydo waxa ay ka dhacasaa Maxakamadda ilaahay maalinta xisaabta. Ilaahay hortiisa maalinta ayna Nafna waxba qarin karin. Guushu kama dhalato tiro badnaan, kama dhalato xoolo faro badan, hubka iyo tiradu waxba ma taraan. Haddii aanu wehelin aqoontu.

Miyaynu tiro yar nahay?

Annaga ayaa ka tiro badan Yuhuudda. Habka ay haystaan muslimiinta ayaa ka badan midka Yuhuudda. Haddii la is barbar dhigo aqoonyahan Sayniska ee Yuhuudda waxa ka badan midka muslimiinta. Dhaqaalaha muslimiinta ayaa ka badan midka Yuhuudda. Haddaba maxaa dhacay? Waxa dhacay ee inna daciifay waa iimaankii haddii aynu ahaanno ilaahay la jirkiida isna waxa uu ahaanayaa la jirkeenna. Haddii aynu dagaalano innaga oo muslimiin dhab ah waa aynu Guulaysanaynaa. Qaddiyadda Falastiin maaha mid carab oo qudha u taal ee waa mid muslimiinta oo dhan u taal.

Tuuggu Hurdo wanaagsan ma seexdo xataa isaga oo hubkiisu gacanta ugu jira. Hadda siduu qofka Yuhuudiga ah Falastiin hurdo iyo rayn-rayn ugu dareemi innaga oo u jeedna! Falastiin kuma gaar aha oo qudha reer Falastiin iyo carab oo kaliya ee waa Qadiyad ka dhaxaysa muslimiinta oo dhan. Carab waxa ku jira qaar aan tan iyo muraad midna ka lahayn Falastiin. Haddii ay gacmaha muslimiintu mid u noqon lahaayeen iyaga oo difaacaya dhulka barakaysan ee uu ku yaal Masaajidka Al-aqsaa ee ilaahay hareerihiisa barakada dhigay. Haddii aad is gacan qaadi lahaydeen oo aad mid u noqon lahaydeen waa aynu ka guulaysan lahaydeen. Ilahayna waxa uu yidhi.

"يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِن تَنصُرُواْ ٱللَّهَ يَنصُرۡكُمۡ"

“Dadka mu’miniinta ahow haddii aad ilaahay u gargaartaan isna waa uu idiin gargaarayaa.”

Guushu waxa ay la xudhiidhaa wakhti kasta u hogonaansanaanta ilaahay. Wakhti kasta oo aynu ilaahay u hogansanno Guushu waa ay inoo soo dhawaanasaa. Wakhtigii uu Nabi **(Muxummed scw)** islaamka la yimid waxa uu ka dhigay islaamka midka hoggaanka u ah Adduunka.

Awoodda xaqa.

Awoodda runta mooyaane wax awood ah oo kale jirto, arrintu way caddahay oo wixii qarsoonaa ayaa soo baxay, waxa aynu ognahay in waardiyihii tuug yahay, ilaaliyuhuna yahay dabadhilif, laakiin Dimishiq ma dhiman waxay difaacaysaa xaqeeda oo ay dadaalkeeda u huraysaa sidii ay xoriyadeeda u heli lahayd. Folkaanaha ayaa ku sigtay in uu qarxo, haddii ay dhacdana waxa ay gubi lahayd cadawga dhabta ah oo ay dabar go’aan lahayd. Waxa aynu ku dhex aragnay ardaydaas oo aan ka baqaynay in neecawdu ay waxyeello u geysataan. Waa Libaaxyo laabta u dhigta xabadaha ay ku soo ganayaan cadawgoodu. Waxa ay ku qaylinaya na dila, waayo, jidhkayaga waxaa ka dhisan madaxbannaanida Suuriya! Maanta waa

maalintii shaqada. Waa maalintii ay dadku xaqooda u istaageen, kuwii ka soo horjeedayna ay u istaageen in ay gardarradooda u doodaan, wayna is khilaafeen, runtuna waa Eebbe. U dagaallankii xornimadii Suuriya. Waxa ay ka heshay suuriy gumaystaha faransiiska xornimada 17-April 1946.

CEEB

Dadaw miyaydaan dareemayn, ceeb! Qalbiayadiina waxa ku dhimatay damqashadii iyo diir naxii walaalnimo! Waddamadeenna waxa ku sugan Dumar iyo caruur qaawan oo darayaysan! Waxa ay ka soo baxeen meelihii ay daganaayeen iyaga oo idin dawarsanaya (tuugsanaya) waxna idin waydiisanaya. Dhulka ayay gogladaan cirkana waa ay huwadaan! Idinkuna waxa aa ku jiiftaan furaashyo ka samaysan buush iyo cudbi jidhka u dabacsan! Waxa waa quutaan wax kasta oo macaan iyo muudba leh. Waa qoslaysaan waxa aad sheeganasaan in aad tihiin dad muslimiin ah! Idinma lihi u dagaalama ee u taga aan idin leeyahay oo caawiya walaaladiin aad ku walaalowdeen diinta iyo dadnimada. Quudiya kuwa baahan inta ayna gaajo u god-galin. Wax uun huwiya inta ayna dhaxantu aakhira u darin. Mid kasta oo innaga midi waa ka mas’uul dadkaas duruufaysan ee ay dantu daashatay. Ha u qabto inta uu awoodo. Ma wax ayaad

iska cunaysaan, oo aad cabaysaan! Oo aad dhoollo caddaynaysaan iyaga oo dad muslimiin ah ay deegaanada aad dagan tihiin gaajo ugu dhimanaya! Waxba tari mayso hadal la yidhi, maqaal la qoray iyo khudbad meel ka baxday. Arrintu waa Nolol iyo Geeri.

Innagaa danbiga leh.

Innaga ayaa siinnay hubka ay inagu dileen, waxa ay inoola yimaadeen maan-dooriye markaas ayaynu cabnay waxa aynu ku bixinnay lacagteennii, waxa ay inoola yimaadeen waxa ay inoogu sheegeen goobo waxbarasho oo lagu barta liidnimada iyo qaawanaanta haweenka. Markaas ayay kharribeen dhallinteennii oo ay ka tageen diintoodii iyo Qur'aankoodii. Waxa inoo keeneen dumarka jidhkooda ka ganacsada markaas ayay xanuunadu bulshadeenii ku hab-sadeen. Markaas ayaynu lacag ugu abaal-gudnay! Waxa ay inoo keeneen balaayo iyo qudhan oo dhan haddana waxa aynu ku abaal-marinnay adduunkeennii iyo dahabkeennii!

Markaas ayay innogu abaal-gudeen in ay inoola yimaadaan hubka kiisa wax tirtira markaas ayaynu innagu tir-tireen. Waxa aynu u habbaynay dhallinyaradeenii markaas ayay inooga

dhigeen ciddii ay innagu gumaadi lahaayeen. Waxa ay inna bareen wax kasta oo xumaan ah, markaas ayay haddana ina gumaysteen, haddana ay ina dileen! Miyaynu wali baraarugnay? Maya, wali maynaan baraarugin. Inta aynu aad arkaynno Hooyo goblantay Gabadh asay qaadday caruur agoomowday! Haddana ayaynu faransiis u naqaan walaalkeen!

Dib u dhaca iyo hurumarka.

Casri kasta oo la nool yahay waxa uu leeyahay ereyo lagu qeexo horumar. Dhallinyaradu wakhti kasta waxa jira wax ay horumar u yaqaanaan. Kun-sano ka hor awowyaasheen waxa ay fuuli jireen Geela, manay aqoon baabuur iyo diyaarado toonna. Waxa ay ku noolaayeen nolol adag waxa ay iftiinsan jireen dabka maanta innaga ina guba! Haddana waxa ay ahaayeen Rag maamuusan oo aan cidna waxba ka sugin cidna ayna guumaysan. Haddaba miyay horumareen mise waa ay dib-dhaceen? Waa horumareen Haddaba innaga ayaa dibu-dhacnay oo dib u noqonay dooni maynno in aynu u laabanno maalmihii gumaysiga ee waxa aynu u laaban dharaarihii ay

awowyaasheen talinayeen oo kale in aynu u noqonno. Wakhtigii uu gacanteenna ku jiray awoodda maamulka Adduunka. Wakhtigii aynu innagu gacanta ku haynay aqoonta. Waa midaas midda mudan in aynu u laabanno. Kuma ay horumarin in ay reer Galbeed daba socdeen oo ay u yaqaaaneen wax kasta oo ay sameeyaan horumar wax kasta oo ay ka tagaanna dib u dhac. Innagu waxa aynu noqonnay in aynu daba soconno Reer Galbeed oo ay ka dhiganno hal-beegga horumarka. Markii ay iska tuureen akhlaaqdii iyo xishoodkii innaguna waxa aynu iska tuurnay xishoodkii iyo xayihiiba! Haddaba miyaynu horumarnay mise waa aynu dibdhacnay?

Dumarka iyo Reer Galbeedka

Maya ha u malayn in dumar reer galbeedku ka badhaadhe karaamo badan yuhiin dumarkeenna. Adduunka ma joogaan dumar ka sharaf iyo maamuus badan dumarkeenna. Guurku agteenna kama aha mid ku dhisab saaxiibtinimo ee waa mid ku dhisan jacayl ay isku calmadaan laba qof ee lamaanaha ah. Ma isku midbaa xeedho hal-qof quutay iyo mid boqolaal gacmood dhex galeen? Waa maya waakaas farqiga u dhaxeeya dumarkeenna iyo dumarka reer galbeed. Qof damiir ka iyo dadnimado iyo diin lihi kuma raali noqdo in ooridiisa ay la wadaagaan Rag kale. Waa middaas waxa ay reer galbeed horumarka ay inoo sheeganayaan. Miyay horumareen mise

waa ay dibu-dhaceen? Waa su’aal iska cad oo ayna laba cali is waydiinayn. Reer galbeed daahirnimadu agtooda waa nijaasnimo. Dhawrsoonaantuna dhinacooda waa doqonniimo. Wanaagguna agtooda waa xumaan. Xumaantuna agtooda waa wanaag! Cidda ku dayataana waa cid dhaba socota Daanyeerro. Dimiirkuna waa uu ka dhintay.

Haddii ay idin yidhaahdaan “waxa aad tihin kuwo ad-adag.” waxa aad ugu warcelisaan haa waanu ada-adagnay. Balse idinku waxa aad tihiin dareere. Haddii ay idinku dhahaan “dib ayaa u dhacdeen waxa aad ku ugu warcelisaan.” waa run oo waxa aanu ku noqonaynaa maalmihii aanu addoonka hoggaamin jirnay oo waxa aanu adduunka u shidi doonnaa nuur waara oo aan marna damin. Haddii ay idinku yidhaahdaan “annagu waanu horumarnay.” Waxa aad ugu jawaabtaan waad horumarteen laakiin waxa aad gaadheen dullinimo iyo liidasho waxa aad ka ban-baxdeen abuurkiinnii toosnaa oo waxa aad u dhaqanteen sida digaaga (doorada) iyo dameeraha. Haddii ay idin yidhaahdaan “ruuxdu waa ciyaar iyo jidh dhiska.” Wax aad ugu warcelisaan ruuxda in la dhiso ayaa ka mudan oo ka horraysa in jidhka la dhiso. Haddii ay idin ku dhahaan “sinaan ragga iyo dumarka.” Waxa aad afkaga dhufataan oo aad ku tidhaahdaan “maxa aad noo sheegaysan in aad samayseen waxa ay xoolo ka xishoodaan oo aad u dhaqantaan si aynaan xooluhu u dhaqmin.” Waana middaas waxa ay doonayaan ururada dhaqan xumadu.”

Mar kasta oo ay idinku yidhaahdaan dalladan iska liita. Ha u aabi yeelina ee ugu jawaaba, jawaabo maankooda dawakhiya idinka oo aan afxumo cay mid adeegsanayn haddana garaadkooda weeraraya.

Sabool iyo Hodan.

Qofka saboolka ah ee seexda Buulka dhoobada ah, ee quuta roodhida daqiiqda (burka) laga sameeyay, ee ku socda kabaha rifmay (daalay) ee ku safra gaadhi-dameerka. Waxa uu suuraysanayaa haddii uu ku seexan lahaa furaashka (joodariga) qof hodanka ah, ama uu wax ku cuni lahaa saabaankiisa (weelkiisa) ama uu kori lahaa baabuurkiisa waxa uu filayaa in uu dareemi lahaa macaanka Adduunka oo dhan. Laakiin midka haysta waxa uu dareemayaa in ayna Adduunka macaankiisa midkaas ahayn! Dhal-dhaalka Adduunka waa sida dhalanteedka oo garan maysid dhalanteedka? Marka aad ka fog tahay waxa aad moodaysaa Balli Biyo ah Laakiin marka aad soo gaadho waa meel madhan!

Adiga oo qudha

Waxa mudan in aad u Noolaato Naftaada oo qudha oo aanad marna wakhti ku bixin hanashada dadka kale. Ha noqdo fadhigaagu, cunistaadu, dhar xidhashadaadu, sida aad doonayso oo ilaahay ka raalida yahay. Farxadaad marna haka raadin dadka kale agtooda si kasta oo aad ugu raadiso ka heli maysid. Dadku waa dad uun, wakhti kastaba oo ay nool yihiin waa isku dabci iyo isku dabeecad. Sideed indheer garad ku noqon? Haddii aad doonayso in aad indheer garad noqoto ku dhaqan Diintaada samee sida aad doonayso adiga oo garaadkaaga wax kastaba ku fiirinaya. Haka cabsan dadka si kasta oo ay kuula dhaqmaab kol haddii aanad samayn wax Diintu innaga reebtay. (**Nabi Muxammed scw**) ayay ku yidhaahdeen waa uu waalan yahay waa sixiroole, waa beenaale! Waxa ay doonaan ha sheegaan ha u aaboyeelin hadalkooda kol haddii aad ilaahay raaligalinaso.

Dhamaanteen waa aynu dhimanaynaa.

Miyaad maqasheen dhabeel (inan) qurux badan oo eegisteedu qalbiga jiidanayso, in ay geeridu daysay wakhtigii la gaadhay in ay dhimato! Miyaad maqashaan barbaar hadda kaalin qaad ah oo jooga wakhtigii uu xaqiijin lahaa rajooyinkiisii uu Nolosha ka lahaa ayay geeridu iska dhaaftay wakhtigii la gaadhay in uu adduunka ka socdaalo! Miyaad maqasheen nin boqor ah oo haysta adduun waxa uu doono sharaf, adduun, magac, muuq, ayay geeridu iska dhaaftay wakhtigiisii! Su’aashu waa maya oo

midna maa ay dhaafin ee jidhkoodii waxa cunay dirxiga. Xoolahoodiina waa la qayb saday. Miyaad ku aragteen wakhtiga aad akhriyasaan Buugaagta taariikhda nin halyay (geesi) ah oo cadawgiisa jiifka u diiday, oo geeridu iska dhaaftay? May ee xataa jidhkiisii waxa uu noqday Ciid ay dadka dul-socdaan qabrigiisiina waxa uu noqday goob ay caruurtu ku ciyaaraan! Ama ay dadku ku xaajo gutaan!

Waxa aad arkaysaan oo aad soo maraysaan goobaha dadka lagu xabaalo (duugo) oo aad ku arkaysaan tilmaamaha lagu garto in ay dad dhintay ku jiraan. Haddaba maxaynu u rumaysan la'nahay in adduunka dhamaantii yahay dhimasho. Maxaynu u maqlaynaa waanida iyo xasuusinta geerida haddana aynu ugu malaynaa in cid aan innaga ahayn hadalku ku socdo! Waxa aynu raacnaa jinaasooyinka haddana waxa aynu ka sheekaysannaa Arrimaha adduunka! Waxba aad moodaa in aynaan dhimanahayn sida ay u dhinteen kuwan aynu ku sugnahay geeriyahooda, kuwaas dhintay ee aynu maantaba aasaynaa waxa ay lahaayeeb yoolal ka wayn ku aynu innagu leenahay Maanta. Xusuusta geerida si ay idinku kaalmayso oo aad nafahiinna u qabataan oo aad uga bogsataan qalbi-qalaylka. Xusuusta si aad u noqotaan kuwa ugu qalbiga dabacsan ee ugu deeqsisan oo nafteennu u aqbasho dhagaysiga waanada. Hana odhan anigu anigu dhallinyaro ayaan ahay. Hana odhan anigu qof wayn ayaan ahayn. Hana odhan anigu qof hodana ayaan ahay. Malaga

geeridu haddii uu yimaado ma yaqaan dhallinyaro, mid gaboobay, mid sharaf leh, mid hodan ah, iyo mid sabool ahna toonna. Garan maysid wakhtiga uu albaabkaaga (arridaada) la soo garaaci doono.

Jidkii Jannada iyo midkii Naarta.

Haddii aad safar gasho kaligaa, oo aad kula kulanto jidkii aad socotay oo laba wadiiqo u kala baxay, mid Buuraha fananaya oo ay adag tahay in la maro oo lagu socdo, iyo mid ay sahlan tahay in lagu socoteeyo. Midka koobaad waxa yaal dhagaxaan, waxa ka qodan godad, waxa ku daadsan qodxo. Waxa adag in la maro qofka marayaa dhibaato ayuu kala kulmayaa. Laakiin halka uu ku dhamaado waxa ku qoron qoraalka ah ‘jidka in la maro waa ay adag tahay laakiin waa jidka ku gaadhsiinaya magaaladii aad u socotay iyo u jeedkii socodkaaga.’

Midka Labaadna waa jidka si fiican u samaysan oo aanay cagtu ku dhib mudanahayn in ay ku socoto, dhinacyadiisa waxa ku yaal dhir hamash ah oo hadh waa wayn leh, oo ubax qurux badanna u iska leh. Oo midhahu ka hareera baxeen. Ha reerihiisa waxa ku teedsan Maqaaxiya iyo wax kasta oo oo Naftu ku raaxaysato. Laakiin waa dariiq halis ah oo lagu halaagsamayo. Labadaa waddo midkee ayaad mari lahayd? Waxa muran la’aan ah in ay Naftu u leexanaso midka sahlan

ee aan adkayn midka macaan ee aan dhibka lahayn. Naftu waxa ay jeceshay dabar la’aanta waana abuur uu ilaahay ku abuuray. Laakiin caqligu waa midka isku miisaama khaladka iyo saxda. Naftu waxa jeceshay in ay raacdo jidkaas qurux badan ee haddana khatar ah. Laakiin haddii aad adeegsato Garaadkaaga waxa aad raacaysaa jidkaa dhibta badan ee ku gaadhsiinaya yoolkaaga waa sidaa Jidka Jannada iyo Naartu.

Nolosha Saxaraha

Taariikhdeeda waxa lagu soo koobaa laba eray: jacayl iyo dagaal. Habeenkeedu waa jacayl, maalinteeduna waa dagaal, cadceeddu dagaal ayay kula jirtaa dadka oo waa ay gubaysaa, kolkay galabtu ku qabato; Oo geesi kasta oo xoog badan ayaa habeenka soo gaadha, waxa aad qalbigaaga u furaysaa jacayl, waxana aad ka dareemaysaa rabitaan jacayl. Sida qofka oomman biyo nadiif ah ugu hiloobay. Habeenkii saxaraha ahaa ayaa naftayda nadiifiyey oo baray inay dareento quruxda foolxumada, inay illowdo kelinimada, iyo heesaha aamusnaanta. Haddaba waxaan gartay quruxda caalamka. Sida ay webiyada saxaraha ahi u dhalaaleen go’aankayga, aniga oo iska tuuraya baqdin, fulaynimo, daciifnimo iyo laba-laag nafteyda, una dareensiisey haybadda iyo awoodda

dabeecadda, sidaas darteed ayaan dareemay weynaanta. dabeecadda.

Lamadegaanka waa la fidiyay oo bannaanka ayaa la soo dhigay; daacad ah oo sharaf leh, muuqashadiisu waa isku mid, oo ma qariyo sirta, mana qariyo wax qarsoon oo aan loo baahnayn in la soo muujiyo. Ma aha sida Ilaahay wuxa uu reebay lamadegaanka, bili-san muuqaalka, quruxda bannaanka webiyada. Laakin taas waxa uu ku badalay wax ka macaan oo qurux badan oo ah daacadnimo, daacadnimo Waxaa ka turjumi karaa macnaheeda habeennada saxaraha ah; Waxaan jeclaan lahaa inaan ku sifoobo kuwa ku qarsoon ee ku nool habeennada saxaraha ah, ee la hadlaya quluubta wax ayna goodbin karin Qalinku.

Maalintii waddanka.

Ma aragteen ciidanka maalinta waddanka? Wakhtiga ay soo baxaan iyaga oo rax-raxan ah. Hal doonis wada leh. Dharka ay ku labasan yihiin midab qudha leeyahay. Aanu jirin mid mid kale ka soocan oo mid kasta waxa uu matalayaa midka dhinaciisa taagan. Waa midnimada ka imanasa quluubta, haddii aynu wakhti kastaba sidaa u midaysanaan lahayn, waxa aynu gaadhi lahayn Guul Adduunka iyo mid Akhiraba. Bal u fiirso maalmaha ciidda dadka. Waxa aad arkaysaa iyaga oo

wada dhoollo caddayna! Sababtuna ay tahay in ay maalintaas hilmaameen qulubkii Nolosha markaas ayay dhoollo caddeeyeen markaas ayay Noloshii iyo dadkiiba u dhoollo caddeeyeen. Ciiddu waxa ay noqotaa mid Diineed oo xanbaarsan arrimo diini ah oo la xidhiidha aaminaada dadka iyo waxa ay rumaysan yihiin. Ama waxay ay noqotaa mid waddan oo xanbaarsan xusuuso iyo dhacdooyin oo saamayn ku leh Nolosha ummadaas. Sida maalinta xornimada amaba qaar xusuuso kale leh sida ciyaaaraha iyo fanka Bulshadaas. Ciiddu mar kastaba waa Cibaado iyo mahad celin ilaahay loo mahad celinayo. Waddan kasta oo muslim oo erayga ilaahay lagaga dhaqmayo waa mid mudan in la jeclaado.

Nolosha afartan-jirnimada.

Yoolka ugu wayn ee aan lahaa wakhti aan dhigan jiray dugsiga hoose waxa uu ahaa in aan macallin noqdo. Waxa aan u arkayay Nolosha macallinimada in ay tahay Jannadii Adduunka sidaas ayay Naftaydu ku jeclayd. Su’aasha ugu wayn ee aan is waydiin jiray waxa ahayd macallinku miyaanu ahayn midka amarkiisa la qaato? Markii aan noqday macallin maan helin Jannadaas, ee waxa aan helay dhul lagu beeray qodxo! Raaxada Noloshu waa dhalanteed marka aad gaadho mid waxa aad dareemasaa in ayna wax jiraba ahayn. Ninka xaaska leh waxa uu jecel yahay in uu ku noqdo noloshii doobnimada, midka doobka ahna waxa uu jecel yahay in uu xaas yeesho.

Midka safarka ah waxa uu rajaynayaa in uu dago, midka dagganna waxa uu rajaynayaa in uu safro. Dhamaanteen waxa aynu nahay dhallaan (caruur) caruurta waxa loo soo iibiyaa wax ay ku ciyaaraan waa ay jeclaadaan waana ay ku farxaan, laakiin wakhti ka dib waxa ay dalbadaan mid kale oo tii hore waa ay tuuraan. Yoolashu marna masoo afgo'aan. Qofka la siiyo Malyan lacag ah haddana waxa uu rabaa laba Malyan. Qofka kor loo qaado shaqadiisa waxa uu rabaa in darajo kale loogu daro. Sidaas ayaan 40-sano ugu jiray Nolol dhalanteed ah. Haddii aanan ilaahay ka cabsanayn wakhti qaar ayaan dalban lahaa Geerida. Xanuun ima hayn saboolnimada kamaan cabanayn. Ee waxa aan la dalaadhacayay in aan Naftayda waayay oo aan ku sugnaa xaalad salow ah.

Qalinkii Cali Al-dandaawi.

Waxa ku kulantay Naftiisa isburinno badan. Mar waxa uu neceb yahay kalinamada, waxa uu dhibsadaa daganaanshaha, waxa uu ku dhex milmaa doodaha suugaanta iyo Edabka. Marna waxa uu ka hadal jeediyaa goobaha lagu kulmo. Marna waa saxafi dagan oo Nolosha qaabilaya. Marna waa suufi waxa uu daneeyaa arrimaha Ruuxaaniyada oo waxa uu weheshadaa Rabbigii, waxana uu jecel yahay gooni-usocdka iyo in uu dadka ka dheeraado. Waxa uu jecel yahay Nolosha dagan waxa uu wakhti ku bixiyaa in uu Naftiisa warsado. Marna waa qofka ugu madadaalada badan. Wakhtina waa qof caadifad badan oo

caadifadiisu hoggaamiso. Marna waa addoon garaad badan oo haddii uu garaadkiisa adeegsado aan caadifadi agtiisa ool.

dhamaad